somali-books
FREE EDUCATION

# Gunaanadka

Ugu dambayntii waxaa mahad leh eebe wayne iisuura galiyay in aan qoro buugaan .

Intaa kadib

Waxaan akhriste rajaynayaa in aad si wanaagsan uga faa iday akhrinta buugaan .

Telegram @SOMALIBOOKS

Waxaan sidoo kale karaali galinayaa wixii iin ah oo buuggu leeyahay , waxaana diyaar u ahay in aan waxkabadalo khalad kasta oo kusoo arooray buugga , haduu alle idmo .


Waxaan kaa rajaynayaa akhriste in aad wixii talo iyo toosin ahba aad iisoo diri doonto si aan wax uga badalo dabcada 2aad inshaa alaah ,

Waxaan marlabaad u mahad celinayaa dhamaan cidii kaqayb qaadatay gacanna iga siisay soosaarista bug yarahaan .


Sakariya axmad maxamed

Zakiaxmed638@gmail.com

@SOMALIBOOKS


Telegram @SOMALIBOOKS



# AFTAHAN

Telegram @SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS






Telegram @SOMALIBOOKS

## Mahad celin

Waxaa mahad leh ilaahay subxaanahu wataacaalaa , iisuura galiyay in aan qoro bug yarahaan kahadlaya sidii aad kor ugu qaadi lahayd aqoontaada ku aadan gudbinta afkaarta .

Waxaan umahadcelinayaa hooyaday , aabahay iyo walaalahay oo kaqayb qaatay barbaarintayda iyo waxbarashadayda .

Sidoo kale waxaan mahad balaaran ujeedinayaa **Aadan salad maxamuud iyo muxiyadiin maxamed c/laahi** oo igala qaby qaatatay sixidda buugga , iyo **iraad c/laahi faarax jabshe** oo ii naqshadeeyay jaldiga buugga .

Iyo dhamaan cidkasta oo ii fidisay taageero kana qayb qaadatay soo saarista buugaan .

Waxaan ugu dambayntii mahad balaaran ujeedinayaa akhristaha buugga oo kalsooni dheeraada igu siiyay iguna dhiiri galiyay soo saarista buug kale .

Dhamaantiin waxaan ilaah idin kaga baryayaa in uu idiinku

Telegram @SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

daro miisaanka xasanaadkiina maalinta aakhiro .

**Zakariye axmad Maxamed**

Zakiaxmad638@gmail.com



بسم الله الرحمن الرحيم

Telegram @SOMALIBOOKS

# UHIBAYN

Waxaan buugaan u hibaynayaa

- ✓ Aabahay **axmad maxamed muuse** ilaahay ha unaxariisto janadii fardowsana ehel ha uga dhigo.
- ✓ Hooyaday **maymuun muuse xuseen**
- ✓ walaalahay meelkasta oo ay joogaan

- ✓ saaxiibadayda qaaliga ah
- ✓ ardaykasta oo aan macalin unoqday



Telegram @SOMALIBOOKS

## Tusmada buuga


| Cinwaanka | Bogga |
|---|---|
| Mahadcelin ........................................ | 3 |
| Uhibayn ........................................ | 4 |
| Tusmada buugga ........................................ | 5 |
| Arar........................................ | 6 |
| **Cutubka 1aad : waa maxay aftahnimo ........................................** | 7 |
| Waa maxay aftahnimo ? ........................................ | 9 |
| Sooyaalka aftahnimada ........................................ | 9 |
| Dheefta iyo dhibaatada aftahnimada ........................................ | 19 |
| Waa maxay tilmaamaha aftahanka fiican ........................................ | 21 |
| **Cutubka 2aad : udiyaargarowga xog jeedin ta ........................................** | 26 |
| Qaabka aad xog uga heli lahayd cidda aad wax ujeedinayso ............ | 29 |
| Ujeedada xogjeedinta ........................................ | 31 |
| Imisaa looqaybiyaa xog jeedinta ........................................ | 37 |
| Maamulista waqtiga ........................................ | 40 |
| Hugga iyo ilaalinta muuqaalkaaga ........................................ | 43 |
| **Cutubka 3aad : diyaarinta xogta ........................................** | 46 |
| Qaabka ugu fiican ee aad udiyaarin karto cinwaanka xogta ............ | 48 |
| Qaybaha ay xogtu ka kooban tahay ........................................ | 51 |
| **Cutubka 4aad : jeedinta wanaagsan ee xogta ........................................** | 60 |

@SOMALIBOOKS

Xogjeedinta kahor .......................................................................................... 62
Waxa laga rabo goobta aad xogta kajeedinayso ................................ 65
Cabsida iyo sida aad uga adkaan lahayd ............................................ 67
Hadalka iyo qaabka aad uwanaajin lahayd ......................................... 71
Luuqadda jirka iyo sidaad u adeegsanlahayd ..................................... 75
Qaabka aad umaamuli lahayd dooda ................................................... 77
Qaabka loo adeegsado qalabka wax lagu soo bandhigo..................... 81
Tilmaamaha dadka aan kufiicnayn xogjeedinta ................................. 83
Gafafka inta badan lakulmaan aftahanadu iyo sida aad uga 84
**Gunaanadka ........................................................................................ 86**
**Tixraaca buugga ................................................................................. 87**



Telegram @SOMALIBOOKS

**Arar**

Ugu horayntii waxaan mahad ucelinayaa eebe wayne oo iifududeeyay in aan qoro buugaan , aan isleeyahay qofkii akhriyaa in haba yaraatee uu wax kadheefi doono , buugaan oo kusaabsan “ aftahnimada “ sida aad afeefta hore ee buuga aad kadheehan karto , intaa kdib

Yoolka aan udoortay aftahanka suuban ama side kunoqonkartaa aftahan , ay tahay in akhristaha buugayga ay kor uqaadmato heerkiisa aftahnimo , markii uu jeedinayo oo uusan noqon mid laga daalo waxa uu sheegayo , balse hadii madaxwayne akhristay uu xog jeediyo uu shacabka haqabtirikaro , oo taliyihii akhristaa asakrtiisa hadal ka ahaqab tiri karo , oo ardaygii akhristaa wax jeedin tiisa loo bogaa , iwm.

Balse waxaa laga yaabaa in arinku uusan saa noqon , wallow

aan isku dayay in aan kuqoro buugaan , afka hooyo ee hodonka ah waa soomaaliga ee , iyadoo ay ku yartahay ereyo kale oo afafkale kasoo jeeda , inkastoo afkeena iyo afka carabiga xiriir wayn kadhaxeeyo oo ha layaabin hadaad ku aragto eray eray carabiya .

Waxaan filayaa akhriste in aad soo indha indhaysay bogga kahoreeya boggan oo ay kamid yihiin bisinka , mahad celinta , uhibaynta , tusmada buuga , cinwaankoo ugu muhiimsanna hakasii horeeyee , balse madoonayo in aan hordhaca kugu xiiso jabiyo ee horay ogal waxbaad kadheefi eebe idin kiiye .



Telegram @SOMALIBOOKS



@SOMALIBOOKS



# Cutubka 1aad waa maxay aftaha nimo ?

Telegram @SOMALIBOOKS



**Arar :-**

Aftahnimadu waa tilmaan uu qofkasta jecel yahay , inuu ku tilmaanaado .

balse mafududa in aad noqoto aftahan , dadka qayb baa rumaysan in aftahan uusan noqon Karin illaa qofkii kudhasha mooye ,

Hadaba waxaan cutubkaan isku dayaynaa in aan , hordhac kabixino , qeexidda aftahnimada , sidoo kale waxaan wax kataaban doonaa , qeexidda xogjeedinta iyo qeexidda ay kabixiyeen aqoonyahanada ku xeel dheer arimahaas

Waxaan sidoo kale milicsandoonaa , sooyaalka ay soo martay aftahnimadu , dheefteeda , iyo sidoo kale tilmaamaha aftahanka wanaagsan

Waxaan isku dayi doonaa in aan wax kasoo qaato , dadka soomaalida dhexdeeda caanka ku ahaa aftahnimada .

Waxaan kuu rajaynayaa akhriste inta aad dhex mushaaxayso cutubkaan in aad si wanaagsan uga faa'idaysan doontid haduu ilaahay noo garto .

Telegram @SOMALIBOOKS



- **Waa maxay aftahnimo**

  Aftahnimo waa in uu qofku haqabtiro cidda dhagaysanaysa isagoo adeegsanaya ereyo kooban , ujeedada hadalkiisana gaarsii naysa .

  Sidoo kale waxaa jira ereyo lamid ah ama udhow ereyga aftahan , sida Afmiinshaar , hadal yaqaan , codkar , iwm



- **Qeexidda aftahnimada cilmi ahaan**

Waa qaabka loo haqabtiro dad kala duwan

@SOMALIBOOKS

Waa qaabka loo haqabtiro dad kala duwan , aragtiyo kala duwanna xambaarsan , iyadoo la adeegsanayo ereyo kooban iyo xilli kooban .

- **Dadkii hore iyo aftahnimada waxa ay uyaqaaneen**

Waa gii hore lama haysan , qalabka cusub ee hadda lahaysto sida codbaahiyaha , iyo samiicadaha , aankee qofkii codka yaraa , uu awood uyeelanayo , in uu gaarsiiyo codkiisa meesha uu rabo , sidoo kale majirin fogaan aragga[1] aad awood uleedahay in aad dadka usoo gudbiso , muuqaalo aad in badan kucel celisay oo aad kasaartay iin oodhan .

Saas oo ay tahay waxaa jiray dad caan ku ahaa aftahnimada oo bulshada dhexdeeda aad looga tixgalin jiray .

Telegram @SOMALIBOOKS

[1] Talefishinka



Si aan ufahano heerka uu aftahanku kajoogay bulshadii hore aan kala qaadno bulshooyinkaas maadama ay kala duwantahay xiliyadii ay noolaayeen .

## 1. Carabtii islaamka kahor

Qofka xog jeediyaha ah waxaa khasab ku ahaan jirtay in uu dhulka istaago





hadii ay dadku meel banaan joogaan , hadii kale wuxuu adeegsan jiray hadba gaadiidka uu markaa saaran yahay , waxa saa uu usameynayaa si dadka oo dhan ay u arkaan .

Aftahnimaduna waxa ay ku tiirsanayd hadba , sida uu qofku u adeegsado ereyo adag oo suugaan ku dheehan tahay , waxa uuna isku dayi jiray hadba intii awoodiisa in uu kusoo daro hadalkiisa murti , maah maahyo , iyo sidoo kale sheekooyin , ama gabayo .

xiligaas aftahnimadu maahayn wax labarto ee waxa ay ahayd wax loo dhasho ,

Aftahanadii ugu caansanaa xiligaas waxaa kamid ahaa

Telegram @SOMALIBOOKS



**Qays bin saacid al ibaadi**[2] waxa uuna lahaa khudbad caan ah ilaa iyo hada

Ereyadeediina waxaa kamid ah iyadoo carabiya [3]


( أيها الناس، اسمعوا وعوا، وإذا سمعتم شيئا فانتفعوا، إنه من عاش مات، ومن مات فات، وكل ما هو آت آت. إن في السماء لخبرا، وإن في الأرض لعبرا. ليل داج، ونهار ساج، وسماء ذات أبراج، وأرض ذات فجاج، وبحار ذات أمواج. ما لي أرى الناس يذهبون ولا يرجعون؟ أرضوا بالمقام فأقاموا

@SOMALIBOOKS

أم تركوا هناك قاموا؟ لا بل لأرباب العاقلة والأمم الخالية والقرون الماضية )

## 2. Giriigii hore

Giriigii hore waxaa lagu tiriyaa in ay ahaayeen dad aad ugu xeel dheeraa siyaasadda iyo maamulka , taas oo khasab kadhigaysa in lahelo aftahano dadka ka dhaadhiciya aragtiyada ay rumaysanyihiin , saas darted aftahnimadu waxa ay ahayd xiligaas , mid qofka kadhigta madax , dadkuna waxa ay aad uqadarin jireen qofka aftahanka ah ,



Xiligaas waxa uu ugaduwan yahay kii carabta , in dadku ay rumay sanaayeen in qofku uu noqon karo aftahan hadii uu barto qaabka loo noqdo aftahan.

Telegram @SOMALIBOOKS

[2] Qays bin saacid waxaa uu kamid ahaa suugaanyahandii hore ee caraqbta waxa uuna dhintay 23 kahor taariikhda hijriga , waxaana uu kazoo jeeday qabiilka "iyaad " diintiisuna waa diintii nabi ibraahim oo sax ahayd

[3] Sababta aan carabigeeda usoo qaatay waa in aad ka aragto xeel dheeridееda waayo hadii suuganta laturjumo way waydaa xelldheerideeda .



Waana midda keentay in ay taariikh yahanadu sheegaan in buuggii ugu horeeyay ee laga qoro aftahnimada iyo qaabka loo noqdo uu ahaa buuguu qoray (( orosdoo[4] )) oo kamid ahaa aqoonyahanadii ugu caansanaa giriiga

## 3 Xiligii islaamka

## 5. Xiligii islaamka

Aftahnimadu waxay ay ahayd arin laga maarmaan ah xiligii islaamka , waayo waxa ay ahayd qaabka kaliya ee lagu gud bin karo dacwada islaamka .

Asxaabtu waxa ay aad xoogga usaari jireen in ay dadka ku haqabtiraan afkooda iyagoo adeegsan , awood , waana midda keentay in ay islaamaan dadkii madiina dagnaa , markii loo diray “muscab binu cumayr “ [5] oo ahaa wiil dhalinyaro ah aftahanna ahaa ilaahayna iimaan badan kumanaystay .

Khudbaddii ugu horaysay ee uu nabigu “ naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee “ meel fagaaraa kajeediyana waxa ay ahayd markuu ilaahay amar kusiiyay in uu dacwada gaarsiiyo reer tolkii , islaamkuna kabaxo , isqarinta , lana muujiyo dacwada islaamka .

Telegram @SOMALIBOOKS

[4] Orosdoo waa faylasuuf giriig kazoo jeeda waxa waxa uuna dhintay 322 sano kahor taariikhda miilaadiga

[5] Muscab bin cumayr al cabdariyi waxa uu kamid ahaa saxaabadii ugu soo hor islaamtay waana safiirkii ugu horeeyay islaamka , waxa uu ku shahiiday dagaalkii uxud .” ilaahay raali hakanoqdee “



Xiligaas oo uu nabigu “ nabadgalyo iyo naxariis korkiisa ha ahaatee “ uu istaagay buurta “ safaa “ [6] uuna dadkii daganaa magaalada makka ujeediyay waxa hadda loo yaqaan war

@SOMALIBOOKS

saxaaradeed , waxaana kamid ahaa hadaladii nabiga nabadgalyo iyo naxariis korkiisa ha ahaatee " {{ " عن ابن عباس قال: صعد رسول الله - صلى الله عليه وسلم - ذات يوم الصفا فقال: يا صاحباه، [ وهي كلمة تقال لمن أراد فاجتمعت إليه قريش فقالوا مالك، قال: أرأيتم لو أخبرتكم أن العدو [ أن يجمع الناس لخبر هام وعام يصحبكم أو يمسيكم كنتم تصدقوني ؟ قالوا: نعم أو بلى – وفي رواية قالوا: ما جربنا عليك كذبا – قال: فإني نذير لكم بين يدي عذاب شديد، فقال أبو لهب: تبا لك ألهذا جمعتنا ؟ قال: فأنزل الله - عز وجل - ( تبت يدا أبي لهب وتب ) :....) }}

## Quraanku muxuu kaqabaa aftahnimada



Culimadu waxa ay dhahaan waxaa aad iskugu xiran aftahnimada iyo waliba gudbinta dacwada islaamka ,

Hadaba eebbe sareeye waxa uu quraankiisa ku sheegay aayado badan oo tilmaamaya in aftahnimadu ay tahay galad uu ilaahay kumanaystay dadkiisa .

Telegram @SOMALIBOOKS

[6] Safaa , waa buur kutaal koonfurta misaajidka dhererkeeduna 6mitir yahay balaceeduna sadex mitir yahay joogeeduna yahay labo mitir waana tiir kamida tiirarka xajka iyada iyo buurta marwaa



## Aayadahaasna waxaa kamid ah

1. Ilaahay kor ahaaye wuxuu yiri (خَلَقَ الْإِنْسَانَ (3) عَلَّمَهُ الْبَيَانَ (4)) oo macnaheedu yahay "dadka wuu abuuray , wuxuuna baray hadalka "[7]
2. Ilaahay kor ahaaye wuxuu yiri ( وَشَدَدْنَا مُلْكَهُ وَآتَيْنَاهُ الْحِكْمَةَ وَفَصْلَ الْخِطَابِ (20)) " waana adkaynay xukunkiisa waxaana siinay xikmad iyo hadal cadayn [8] " saad 20
3. ( وَأَخِي هَارُونُ هُوَ أَفْصَحُ مِنِّي لِسَانًا فَأَرْسِلْهُ مَعِيَ رِدْءًا يُصَدِّقُنِي إِنِّي أَخَافُ أَنْ يُكَذِّبُونِ (34) ) oo tafsiirkeedu yahay "walaalkay haaruunbaana iga aftahansan ee ila dir xoojin ha ii rumeeyee waxaan kacabsan in ay ibeeniyaan "
4. Ilaahay kor ahaaye wuxuu yiri (ادْعُ إِلَى سَبِيلِ رَبِّكَ بِالْحِكْمَةِ ...الاية) oo tafsiirkedu yahay "ugu yeedh jidka eebahaa si xigmada " al naxal 125

Telegram @SOMALIBOOKS

## Nabiga iyo hadalada uu kayiri aftahnimada

Nabiga " nabadgalyo iyo naxariis korkiisa ha ahaatee " wuxuu eebe kumanaystay aftahnimo , taasoo keentay in ay jiraan xadiisyo badan oo looyaqaan "jawaamic al kalaam " oo micnaheedu yahay kuwa hadalkoo dhan lagu soo aruuriyay , ujeedada loogu bixiyayna waa xadiis ereyo ahaan aad uyar

[7] Kitaabka turjumidda quraanka kariimka , ee uu turjumay sheikh maxamuud maxamed cabdi , daabacdayna madbacdda fahad ee daabicista quraanka kariimka . bogga 739
[8] Isla kitaabkaan bogga 625

@SOMALIBOOKS

laakiin hadii ladhaho dheefihiisa iyo macnaha uu xam baarsan yahay aan maantoo dhan laga dhamaanayn ,

Nabiguna waxa uu asxaabtiisa ku tababarijiray in ay noqdaan kuwo awood uleh gudbinta , diinta islaamka ,

Xadiisyada tilmaamaysa aftahnimada nabiga waxaa kamida

1. Dardarankii nabiga uu kula dardaarmay " mucaad bin jabal "[9] iyo " abii muusaa al ashcari "[10] waxaana kamid ahaa (( يسرا ولا تعسرا ، وبشرا ولا تنفرا ، وتطاوعا ولا تختلفا ))

   Bal xadiiksaa ufiirso nabigu waxa uu uga dhigay saad rag loo dirayo wadamo dhan in ay maamulaan , ujeedada uu nabigu u adeegsaday ereyadaa kooban oo macnaha wayn xambaarsan waa sidii ay uxasuusan lahaayeen , xadiisku waxa uu si wayn uga hadlayaa waxa hada loo yaqaan " siyaasada " waxa uuna nabigu si xeel dheer ugu tilmaamay qaabka ay ula dhaqmi lahaayeen cidda ay utagayaan , wuxuuna usheegay in aysan adadayg siyaada la tagin , in ay dadka u bishaareeyaan oo aysan argagax ku beerin , hadaba xadiiska waxa aad uga muuqata in nabigu uu ahaa aftahan .

Telegram @SOMALIBOOKS

---

[9]Mucaad bin jabal al khasraji wuxuu dhashay sanadii 602miilaadiga wuxuuna kudhashay madiina wuxuuna islaamay isagoo 18 jir ah , nabiguna waxa uu cadeeyay in uu ahaa ninka ugu ogaal badan xalaasha iyo xaaraanta wuxuuna kudhintay shuuna urdun snadii 18 ee hijriga 639m

[10] c/laahi bin qays bin saliim wuxuu kudhashay yaman wuxuuna kamid ahaa saxaabadii horay usoo islaamtay wuxuuna ku dhintay makka 42 hijriga

2. Caaisha bintu abii bakar[11] " ilaahay raali ha ka noqdee waxaa laga wariyay in ay tiri (( كان كلام رسول الله صلى الله عليه وسلم كلاما فصلا يفهمه كل من سمعه ))

   Caa isha waxa ay xadiiskaan noogu cadaynaysaa in nabiga " naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee " uu ahaa hadalkiisu mid cad qofkasta oo maqla uu garan jiray .

**Ujeedada khudbadihii_nabiga ay xam baarsanaayeen**

1. In ay cadeeyaan xukun sharci ah sida khudbadii uu nabigu jeediyay markii lafurtay magaalada makka .
2. In lasaxo wax si qaldan loo fahmay sida khudbadii uu nabigu jeediyay markay saxaabada qayb kamid ah iyo gaaladuba ay aamineen in ay qoraxdu lamadoo baatay geeridii wiilka nabiga .
3. In dadka lagu dhiiri galiyo jihaadka ama wax bixinta
4. Kasheekaynta dhacdooyinka dhici doona xiliga soo foodleh ama ku waano qaadashada wixii horay udhacay .
5. Iyo ujeedooyin kale oo badan

Telegram @SOMALIBOOKS

[11] Caaisha bin c/laahi bin abii qaxaafa hooyadii mu'miniinta waxay kudhalatay makka sanadii 604m waxay ahayd caalimad kanawarisay nabiga axaadiis farabadan waxayna kudhimatay madiina sanadii 58 hijriyada 678 miilaadiga

@SOMALIBOOKS


**4. soomaalidii hore**

Hadii aynu eegno soomaalidii hore iyo aftahnimadu waxaad ba moodaa inay ahaayeen , kuwa ugu horeeya ama labaad ee xaga aftahnimada , tusaale ahaan waxaa dhici jirtay in boqolaal nin oo geed isugu timid arin adag awgiis uu hal kamid ihi afar weerood ku kala dareerin jiray , afartaas weerood oo noqon kara gabay , geeraar , maah maayo , ama aayado hadalka eebe wayne kamida , ama hadalkii suubanaheena , isagoo kaashanaya aftahnimadiisa .




Markaas ayay bulshada inteedii goobta kamaqnayd isku waraysan jirtay , " wallaahay hebel waa aftahanoo , ee ragii shalay intaa markuu yiri ayay kala aqallo aadeen"

Telegram @SOMALIBOOKS

Waxaynu aftahan soomaaliyeed oo hore oron karnaa abwaankii maansada kuxaajo warami jiray oo asagoo gabyaya yoolkiisa baydad kooban bulshada ku gaarsiin jiray .

Waxaynu aftahan oron karnaa waayeelkii tixaha kooban kuwada hadli jiray , halka haday tiraabaan ay maalin kudhawaad warami lahaayeen , waxaan aftahan oran karnaa dadkii maahmaaha kumanaanka kor udhaafay sameeyay , tusaale ahaan ruuxii yiri “ korwaayeel waa wada indho “ oo waayaabe ruuxu markuu da’noqdo ma indho labo kabadan ayuu yeeshaa , arinkuse saas maahe aftahankani waxa uu inoo cadaynayaa in qofka waayeelka ahi uu dhacdo hadii arin laga waydiiyo uu kawar celin karo , maxaa yeelay badnaanta gu’yaasha nolashiisa iyo soo noqnoqodka mid lamida dhacdada hadda taagan ee wax laga waydiiyay ayuu waayeelku ku tijaabo bartay , ase indhihiisu waa labo hadayba kadhicin ama liidan .

Telegram @SOMALIBOOKS

Akhriste aftahnimada soomaalidii hore intaa kuma eka waxaa kaloo jiray halbeega aftahanka , taas oo macnaheedu yahay , googaalaysiyo iyo xujooyin qofkii furaa ama kawar celiyaa aftahan loo aqoonsan jiray .

Aftahanimaduna kuma ekayn ragga oo kaliya , oo waxaajiray dumar caan kanoqday aftahnimada , kuwaas oo tix iyo tiraaba aan lagu gaari jirin , oo mararka qaarkood furi jiray xujooyin rag badan foodda siin waayeen .

Akhriste waxaa hubaal ah in aad inbadan oo sheekooyin ka

@SOMALIBOOKS
markhaati kacaya aftahnimada soomaalida aad maqashay .




## ■ Dheefta iyo dhibaatada ay leedahay af tahnimadu

**1. Dheefteeda**

- Waxay kaalin wayn kaqaadataa ku baraarujinta bulshada inay kaqayb qaataan wanaaga iyo hormarka bulshada .
- Waxay kaqayb qaada taa kobcinta garaadka bulshada iyo faafinta aqoonta , iyo dhaqanka.

Telegram @SOMALIBOOKS




- Waxay kaalin wayn kaqaadataa dawaynta cudurada bulshada aafeeya sida kadagista dhaqanka , diinta , iyo ujan jeeridda dhaqamada xun xun.
- Waxaa hubaal ah in aftahanimadu ay dheef wayn

kuleedahay qofka aftahanka ah waayo waxa ay u horkacaysaa , in uu noqdo qof bulshada dhexdeeda maamuus iyo magac kuleh .

•



**2. Dhibaatooyinka ay leedahay aftahnimadu**

- Waxaa loo adeegsan karaa si qaloocan taasoo sababi karta in uu kaqayb qaato aftahanku , duminta ama , habaabinta bulshada .
- Waxa ay qofka ku keeni kartaa in uu yeesho cadow badan maadaama uu yahay qof bulshada caan ka ah .
- Waxaa laga yaabaa in ay ku beeranto isla wayni dheeri ah taasoo keenta inuu qofku laqabsanwaayo bulshada .

Telegram @SOMALIBOOKS

Akhriste waa hubaal in aad hayso faa idooyin ama dhibaatooyin intaa kabadan oo ay leedahay aftahnimadu .

Balse waxaad ogaataa in wax walba ay leeyihiin samaan iyo xumaanba .

Oo ay kuxirantahay hadba qofka , samaynaya waxaas .

Waxaan tala ahaan kusiin in aad waligaa dhanka wanaaga ujan jeerto , xirfadaadana bulshada wax ugu tar ee wax ha ugu dhimin .

@SOMALIBOOKS




## ■ Waa maxay tilmaamaha aftahanka fiican [12]

Telegram @SOMALIBOOKS

Waxaa lagama maarmaan ah in aan ogaano tilmaamaha aftahanka fiican , ujeedaduna waa in aad ogaato akhriste , waxa aad rabto inaad noqoto , waa wax sidee ah

Waxaad ogaataa in xirfad kasta ay leedahay , tilmaamo lagu garto xirfadaas



Inkastoo ay badan yihiin tilmaa mahaas waxaan kusoo koobaynaa qodobadaan soo socda .

1. **Aqoon**

Qofka aftahanka ah waa inuu yahay qof aqoon uleh

hadba mowduuca uu kahadlayo , hadii kale waxaa hubaal ah in uu isagu is kahorimaanayo ama uu sheego wax dadka badankii ogyihiin inay gaf tahay . ilayn horaa waxaa looyiri “ **weel walbaa wixii kujiruu dhididaa** “

[12] فن الالقاء الرائع – د.طارق السويدان ، الناشر الابداع الفكري ، 2008م ،ص26 ( qaabka ugu wanaagsan ee wax loo jeediyo ) qore Dr. daariq alsuwaydaan , waxaana daabacday madbacada Al ibdaac Walfikr , sanadkii 2008 , bayjka 26



Telegram @SOMALIBOOKS

## 2. Diyaargarow fiican

Sida ay aqoontu lafamaarmaan u gu tahay aftahanka , ayaa waxaa laga rabaa in aad ugu diyaar garoobo , xogta uu jeedin doono , ujeedkuna waa , in dadku ay inta badan dhowraan hadba inta uu le’egyahay diyaar garowgaagu

## 3. Mid ku xeel dheer afka

Waxaa laga maarmaan ah ah in xogjeediyuhu uu aad ugu xeel dheeryahay afka uu hadba wax kusoo jeedinayo , uuna awood uleeyahay , in uu hal erey uu udeegsan karo dhowr erey oo kala duwan , waa in uu yahay mid yaqaan afka suugaanteeda , iyo waliba makaabeheeda , si uusan ugalin gaf wayn oo ku aadan afka taasoo ku keeni karta in uu waayo kalsoonida dadka dhagaysanaya .

## 4. gudbinta fariin cad

Waxaa laga rabaa in aadan marwalba isku taagin xog

@SOMALIBOOKS

Waxaa laga rabaa in aadan marwalba isku taagin xog jeedin ,wax walbana aadan kahadlin , taa badalkeed waxaa lagaa rabaa hadaad rabto in aad noqoto aftahan qiimo kuleh bulshada , waa in aad tahay mid gudbinaya fariin cad oo xambarsaan arin laga maarmaan u ah bulshada , waa in ay tahay waxa aad kahadlayso wax aad ku talagashay in aad bulshada ucadayso , kana saarto mad madowga kaga jira arintaas .



Telegram @SOMALIBOOKS

5. **Kalsoonida nafta**

Waa in aad tahay mid naftiisa ku kalsoon , haddii aadan adigu rumaysnayn in aad tahay aftahan , yaad kasugaysa in ay kuu aqoon sadaan aftahan , waxaa laga maarmaan ah in aad qudhaada usheegto in aad aftahan tahay , oo aadan baqin ee aad waligaa diyaar u ahaato , inaad kahadasho dadka hortooda , habadnaadaan ama hayaraadan , hakaa aqoon bataan , ama hakaa hooseeyan.

6. **Runta**

Waa in  aad tahay runlow , waayo islaam ahaan waa wax ilaahay na korsaaray oo qof kastoo muslima waxaa khasab ku ah inuu ka fogaado beenta , intaa kasakow , waxaad ogaataa , qofka xogjeediyaha ah meekhaanka ugu

way n ee uu haysto waa , raali ahaanshaha bulshada iyo sumcadda uu kuleeyahay , balse maalinta ay bulshadu ogaato in aad been sheegayso waa lagaa dareerayaa , cidnana kudhagaysan mayso aankeen hadaad run sheegayso soomaalidu waxa ay ku maahmaahdaa " **beentaada hore runtaada dambay udaran tahay "**



Telegram @SOMALIBOOKS

7. **Ilaalinta xaaladaha ay kusagan yihiin dhagaysta yaasha**

Horaa waxaa looyiri " **qofkasta kulahadal inta uu garaadkiisu yahay "** waxaa muhiim ah in aftahanku dareensan yahay cidda uu lahadlayo waa dad jaadkee ah , kawaran hadaad kala hadasho , ilmo dugsiga hoose dhigta , qaabka loo maamulo bankiyada , miyaysan dhib ku keenayn? , miyaysan ahayn waqti dhumis ? .

8. **Hadal suge ah**

Nabiga " naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee " wuxuu yiri (( لايؤمن احدكم حتى يحب لاخيه ما يحب لنفسه ....)) oo mec naheedu yahay (( qofkiin idin kamida madha

@SOMALIBOOKS

maystirmo ilmaankiisu ilaa uu lajeclaado walaalkii waxa uu lajecelyahay qudhiisa )) , qofkasta oo aftahana waxa uu jecel yahay in ladhagaysto , kawaran marka hadii aadan adigu dadka dhagaysan marka ay hadlayaan , yaad kasugaysaa in ay ku dhagaystaan .

**9. Inuu rumaysan yahay waxa uu jeedinayo**

Qofka xog jeediyaha ah waa in uu rumaysanyahay , aragtiyada uu rabo in uu ka dhaadhiciyo dhagaystiyaashiisa , hadii kale waxa uu unoqonayaa , codbaahiye gudbinaya hadalka lasoo marsiiyo oo kaliya , taasna waxa ay kugu keeni



Telegram @SOMALIBOOKS

kartaa meekhaan darro iyo in ay dhumo meekhaankiisu uu kulahaa bulshada .

Akhriste waxaad ogaataa in aad awood uleedahay in aad ku tilmaanaato tilaamahaas aan kor kusoo sheegay waa , hadii aad rabto in aad noqoto aftahan , wax tara bulshadiisa , gudbiya aragtiyada iyo dhaqanka wanaagsan , kawacyigaliya bulshada , dhaqamada xun xun , kuna booriya sidii ay u ahaan lahaayeen bulsho is haysata ee aan kala qoqobnayn .

Sidoo kale waxaad ogaataa akhriste inay jiraan tilamaamo kale uu leeyahay aftahanku , balse aan intaas kusoo koobnay , adaa lagaa rabaa in aad raadiso inta kale , waayo adiga ayaa

raba in aad noqoto aftahan , adaa lagaa rabaa in aad ku dadaasho , helidda wax walba oo kuu fudu daynaya inaad gaarto hankaaga .

Telegram @SOMALIBOOKS





@SOMALIBOOKS



# Cutubka 2aad

# udiyaar garowga

# xog jeedinta

Telegram @SOMALIBOOKS



**Hordhac**

In aad is diyaariso waa sida kaliya ee aad qurux uga dhigi lahayd xogtaada , qaab nooceeya baad isku diyaarinaysaa maxaa lagaa rabaa in aad samayso ? waa arinta aan rabo in aan kaga hadlo cutubkaan soo socda .

Waxaa diyaar garoowgaaga ugu horeeya waa in aad barato dhagaystiyaashaada .

waayo Dhagaystuhu waa qaybta ugu muhiimsan ee saamayn ku yeelataa qofka xog jeediyaha ah , waayo waa cidda uu rabo in uu haqabtiro , dadkaasina waxa ay ka kooban yihiin qaybaha bulshada , waxaa kujiri kara dhalinyarada , dumar , dad waa wayn , sidoo kale waxay ahaan karaan aqoon yahanno , arday , dad aan wax aqoon , ama waxa ay ahaan karaan , ganacsato , ama dad tabaalaysan ,

Hadaba waxaa lagamaarmaan kuu ah in aad taqaan qaabka loola dhaqmo dadka dhagaysanaya ama kasoo qayb galaya hadalka aad jeedinayso , waa in aad ogtahay waxa dhibaya iyo waxa ay jecel yihiin , waa in aad awood uleedahay labo qof oo is neceb oo iska soo horjeeda , inaad wada haqabtirto , oo ay heshiis kunoqdaan hadalada aad jeedinayso , waa in aad tix galisaa dadka kaasoo horjeeda adoon ka dulboodayn aragtidaada .

Telegram @SOMALIBOOKS



Waxaana hubaal ah akhriste inaysan ahayn arin fudud in uu qofku isku keeno arimahaas aan kor kusoo sheegay , waana mida khasab iiga dhigtay in aan kadhigo cutubka labaad ee buugga .

Waxaan danaynayaa in haduu ilaah idmo aad sifiican uga dheefi doonto wax waynna kaa badali doono .

@SOMALIBOOKS

Isku day in aad dhaqan galiso , aragtiyada iyo talooyinka aad ku arki doonto cutubkaan .

Waxaan kahadli doona inta aan cutubkaan ku jirno arimahaan soo socda

1. **Qaabka aad xog uga heli lahayd cidda aad wax ujeedinayso iyo cidda soo qaban qaabisay kulanka .**
2. **Ujeedada hadalkaaga**
3. **Inta ay uqaybsamaan xogtu**
4. **Waqtiga iyo ilaalintiisa**
5. **labiska iyo ilaalinta muqaalkaaga**

Telegram @SOMALIBOOKS



**Qaabka aad xog uga heli lahayd cidda aad wax ujeedinayso iyo cidda soo qaban qaabisay kulanka .**

- **Su'aalaha aad waydiinayso cidda soo abaabushay koobta aad wax ka jeedinayso** [13]

In ta badan xogieedinta , waxaa soo abaabula hay'ado

in ta badan xogjeedinta waxaa soo abaabula hay'ado kuwaas oo laga yaabo inay kaa codsadaan , inaad ujeediso xog , hadaba hadii ay taas dhacdo waxaad ku khasbantahay in aad waydiiso waydiimahaan soo socda si ay unoqoto xog jeedintaadu mid guulaysata ,  waxaana kamid ah .

1. Magaca hay 'adda iyo warbixin kooban oo  ku saabsan hay'adda
2. Waydii sababta ay adi kuu doorteen ?
3. Waydii ma adi kaliyaa kahadlaya mise cidkalaa jirta oo iyana wax soo jeedinaysa?
4. Waydii dadka kasoo qayb galaya xogjeedinta waa dad nooceeya ?
5. xogta  aad kahadlayso waa mid nooceeya ?
6. Waqtiga aad haysto waa intee ?
7. Warbixin kusaabsan goobta aad wax kajeedinayso ?
8. Majiraan arimo xasaasi ah oo ay  tahay in aan ilaaliyo ?
9. Dadka kasoo qayb galaya ma iyaqaanjin ?
10. Madad iga soo horjeeda fikir ahaanbaa ?

Telegram @SOMALIBOOKS

[13] Qaabka ugu fiican eel wax loo jeediyo , tix raac hore , bayjka 36



11. Majiraan arimo siyaasadeed oo saamayn ku yeelan kara xogjeedintayda ?

■ **Qaab kee baad ku heli kartaa war bixin ku aadan**

@SOMALIBOOKS

**dhagaysti yashaada** [14]

| No | Su'aasha | Tusaale | Jawaab taada |
|---|---|---|---|
| 1. | Yaa ubadan meesha ? | Ganacsato , arday, jaamiciyiin , dhalinyaro , macalimiin, maamulayaal, dumar , siyaasiyiin ,iwm | |
| 2. | Maxaan ka aqaan ? | Da'ada , heerka aqoonta, shaqada , iwm | |
| 3. | Aqoonta ay ii leeyihiin ? | Ima yaqaanaan , aqoon guud , ima xiiseeyaan , aad bay ii jecelyihiin | |
| 4. | Baahi intee le'eg bay uqabaan xogtaan ? | Mid wayn , mid dhexe , mid kooban , umaba qabaan | |

- Saamaynta ay leeyihiin tirada dhagaystayaasha [15]

| **Tirade dhagaystayaasha** | **Tilmaamahooda** | **Maxaa kula gudboon** |
|---|---|---|
| Dhagaystiyaal aan badnayn ( 25 kayar ) | ■ Aad bay kuula socdaan<br>■ Su'aalahoodaa badan | ■ Dadka oo dhan isha kala soco<br>■ Isku day in aad fiirinta kubadiso |
| Dhagaystiyaal badan ( 25 kabadan ) | ■ Buuqoodaa bata<br>■ Caajiskaa kubadan<br>■ Inta kula socotaa yar | ■ Hubi in ay dadku kuwada arkaan<br>■ Hubi in lagu maqlayo gaar ahaan kuwa gadaal fadhiya<br>■ Soo koob hadalkaaga kuna cel celi meelaha muhiimka aha |

Telegram @SOMALIBOOKS

[14] Isla tixraacaan , bayjka 38
[15] Isla tix raacaan , bayjka 39



- **Ujeedada xogjeedintaadu maxay tahay**

Arimaha ugu muhiimsan ee kadhigi kara xogjeedintaada mid

aad usaraysa , dadkuna ay ubogaan , waa in ay cadahay ujeedada aad kaleedahay , waayo markaas baad ogaan kartaa in ay mira dhashay xogjeedintaadii , laakiin haddii aysan lahayn wax ujeedaa ee aad iska jeedisay oo kaliya , hadhow kuuma suura galayso in aad qiimayn kusamayso , hadaba waa in ay caddahay in ta aadan waxba jeedin ujeedka aad ka leedahay .



Hadii aan sifudud kuu fahansiiyo ujeedka

lagaa rabo in aad cadayso

waa warcelinta waydiimaha [16]

Telegram @SOMALIBOOKS

- Waa maxay waxaad rabto in ay dhagaystiyaashaadu ogaadaan ama ay fahmaan ama ay dareemaan marka aad dhamayso hadalkaaga .
- Waxa ay dhagaystiyaashaadu rabaan in aad usheegto

[16] Isla tixraacaan bayjka 42



Hadaba ujeedooyinkaas waxay ugayb sami karaan dhowr

@SOMALIBOOKS

Hadaba ujeedooyinkaas waxay uqayb sami karaan dhowr qaybood oo kala aha

1. **Ujeedooyin guud**

Inta badan xogjeedin kasta waxa ay leedahay ujeedooyin guud oo lagamaarmaan ah in aad qeexdo , laakiin hadii kulanku yahay mid ay hay'ad soo diyaarisay iyada ayaa laga rabaa in ay qeexdo waa maxay ujeedka guud ee kulankaas , tusaale hadii ay jaamacad soo diyaarisay kulan ardayda dugsiyada sare ee magaalada , muxuu ahaan karaa ujeedka guud ee kulankaas ,

Hadii aan kajwaabno su'aashaas waxa uu ahaan karaa " sidii loo suura galin lahaa isku xirka ardayda loona xoojin lahaa is dhex gal kooda "

Marka adi saamayn intee le eg bay kugu yeelanaysaa ujeedka kulankaas hadii aad kuleedahay hal xogjeedin oo tusaale ahaan kahadlaysa " ahmiyadda aqoontu uleedahay qofka "

Waxaa laga yaabaa in aad is dhahdo ani wax saamayn ah iguma yeelanayso , dadka soo qaban qaabinaya kulankaa laga rabaa in ay xaqiijiyaan ujeedadaas .

Saas arintu maahan , saamayn wayn bay kugu yeelanaysaa waayo waxaa lagaa rabaa inta aad xogta aad jeedinayso in aad xaqiijiso ujeedadaas guud oo aad isku

Telegram @SOMALIBOOKS

daydo intii awoodaada in aad dhab ka dhugto , tusaale ahaan waxaad samayn kartaa in aad xogjeedintaada kusoo darto dood taasoo keeni karta in ay ardaydu isbartaan , waxaad ku dari kartaa su'aalo waxaad ku dari kartaa dood wadaag adoo uqaybinaya ardayda kooxa kooxo adoo markaas udiraya in ay kadoodaan arimo laxiriira xogjeedintaada ,

Taasina waxa ay keenaysaa in aad kasbato kalsoonida cidda soo abaabushay kulankaan, waayo waxaad xaqiijisay ujeedkii guud ee laga lahaa kulankaan

Sidoo kale waxaad kasbatay kalsoonida dhagaystiyaashaada , waayo waxaad tustay in aragtidoodu muhiim tahay sidoo kale waxaad siisay fursad ay ku cabiraan , waxa ka guuxaya .

Telegram @SOMALIBOOKS

Haddii xogtu ay tahay mid aad adigu soo abaabushay , markaas adaa lagaa rabaa in aad qeexdo waa maxay ujeedada aad kaleedahay xogjeedintaan .

Hadii aysan xogjeedintu lahayn ujeed guud waxay sababaysaa in lawaayo nuxurkeeda , xataa adi laftigaagu magaran kartid sababta aad usoo diyaarisay xogtaan , taasoo kugu keeni karta , in aad dhumiso xiisaha aad uqabto diyaarinta xogtaan , waana mida keenta xataa in aad iloowdaba in aad balan lahayd , oo aad ku baraarugto

@SOMALIBOOKS

iyadoo waqti yar kaharsanyahay in aad maanta meel heblaayo kuqornayd .

Aftahanna ma noqdo qof aan xiiso uqabin waxa uu soo jeedinayo ,waana dhib hadii aysan adi kaa daa dagin waxa aad rabti in aad cidkale ka dhaadhiciso .

Akhriste hadhayal sanin in aad udajiso xogtaada ujeed guug oo aad kaduulayso .

**Ujeedooyin gaara**

Telegram @SOMALIBOOKS

Ujeedooyinka gaarka ah waa kuwo aad adigu aad dajisay , waxa ayna sitoosa ula xiriraan xogta aad kahadlayso markaas , waana muhiim inta aadan bilaabin qorista xogta aad jeedinayso , in aad qeexdo waa maxay ujeedka aan kaleeyahay xogtaan , ama maxaan udoortay cinwaankaan ,

Taasi waxa ay kuu fudu deenaysaa in aad adoo kaduulaya ujeedooyinkaas aad diyaariso xog xiiso iyo nuxur leh ,

Tusaale ahaan haduu yahay cinwaanka aad ka hadlayso " waxtarka aqoontu uleedahay qofka " muxuu noqon karaa ujeeda gaarka ah ee aad ka leedahay cinwaankaan .

Waxaan dhihi karnaa tusaale ahaan

- In uu dhagaystuhu ku dadaalo aqoonta

- In uu iska ilaaliyo waxyaalaha ku keeni kara aqoon darada
- In uu dadka ku kaalmeeyo waxa uu bartay
- Farqiga udhexeeya qofka aan aqoonta lahayn iyo kan aqoonta leh

Ujeedooyinkaas iyo kuwa kaloo badan buu lahaan karaa cinwaan kaas, hadaba ujeedooyinkaas waxa ay kaa caawin karaan in aad diyaariso xog nuxur leh .

Telegram@SOMALIBOOKS

Waxaa laga yaabaa mararka qaarkood in ay cidda soo abaabushay kulankaas ay fara galin kugu samayso oo dhahdo, xogtaadu waa in ay ahaataa qaab kaas , ama hakusoo darin arinkaas ,

Markaasna aday kugu xirantahay go'aankaad qaadanayso , laakiin halmid waa in aad maskaxda ku hayso , taas oo ah , in aad waligaa yeelin arin dhib ukeenaysaa waxyaalaha aad aaminsantahay , ama dhaawacaysa sharaftaada iyo sumacadaada , waayo , saan horay soo sheegay , hantida kaliya ee qofka aftahanka ah uu leeyahay waa sumacadiisa iyo kalsoonida ay dhagaysti yaashaadu kuu qabaan .

@SOMALIBOOKS



## 2. Ujeedooyin qarsooon

Waxaa jira ujeedooyin qarsoon oo qofkasta oo xogjeediyaa uu leeyahay , ujeedooyinkaas waa mid uu qofka wax jeedinaya uu iswaydiinayo ,

Maxaan kafaa idayaa soo jeedinta xogtaas? ,




telegram @SOMALIBOOKS

Ujeedadaas waxa ay noqon kartaa , tusaale ahaan.

- Inuu kahelo lacag .
- Siduu caan ku noqon lahaa
- Qof dadka dhexdiisa sharaf iyo maqaam kuleh
- Arimo siyaasadeed siduu uga faa idaysan lahaa .


iyo ujeedooyinkale oo uqorsoon , wax dhib ahna kuma jirto in aad leedahay , ujeedooyin adi kuu qarsoon oo aad rabto in ay xogjeedintu kaqayb qaadato fulinteeda .



## ■ Imisaa loo qaybiyaa xogaha [17]

xogta waxaa loo qaybiyaa dhowr qaybood waxaana kamid ah qaybahaas .

1. **Xog cilmiyeed**



Telegram @SOMALIBOOKS

Xog cilmiyeedka waxaa lagu tiriyaa in ay tahay xogjeedinta ugu xamaasadda yar ,oo aan ubaahnayn aftahnimo , ama in aad adeegsato erey suugaaneed , waxaana noocaas hoos imaankara kuwa jaamacadaha laga jeediyo , kuwa uu macalinka ujeediyo ardaydiisa , laakiin hadii aad aftahan tahay , waxaa laga yaaba in aad , kadhigto xogta mid sitoosa ula hadasha damiirka iyo maanka qofka saamayn waynana ku yeelata , hadii kalase waxay noqonaysaa , oo kaliya cashar aad meel ka jeedisay , dadka qayb tiina xifdiyaan qaybna aysan dhag jalaq usiin .

2. **xog diineed**

Markaan leeyahay xog diineed , waxaan ula jeedaa waxdiga

@SOMALIBOOKS

Markaan leeyahay xog diineed , waxaan ula jeedaa waciga , waxayna caan ku tahay waxa uu sitoosa ula hadlayaa qalbiga qofka , sidoo kale waxaa saamaynteeda ladareemaa inta ay

[17] maxfuud ,sheikh cali , fanka khudbadaha iyo diyaarinta khadiibka , daar al ictisaam Bayj: 69 -112



xogjeedintu socoto sida in dadku ay aad ula dhacaan , ama ay la qiiroodaan , hadba mowduuca uu sheekhu kahadlayo , waxaayna ubaahantahay in laga shaqaysiiyo dhamaan jirka qofka wax jeedinaya , tusaale adoo kahadlaya naar hadaad qososho , waxaad diraysaa fariin cad oo ah , ha irumaysan

Telegram @SOMALIBOOKS

3. **xog siyaasadeed**

Waa xogaha laga jeediyo barlamaanada hortooda , ama golayaasha dowlada , sidoo kale waa xogaha ay jeediyaan siyaasiyiinta , ha ahaado kuwa xil haya ama kuwa mucaarad aha , waxaana lagu tiriyaa inay tahay kuwa ugu daran uguna adag , waayo waxa inta badan si aad ula socda shacabka , sidoo kale waxaa xoogga saara saxaafadda , kuwaas oo inta badan aad urogroga khudabada has , si ay uga soo saran aragtiyo siyaasadeed , oo laga yaabo xataa inaadan adigu udan lahayn sida loo dhigay hadalka ,

Qofka raba in uu jeediyo khudbad siyaasadeed waxaa muhiim ah in uu ilaaliyo arimahaan soo socda .

A. Waa in uu aqoon xeel dheer uleeyahay shuruucda iyo xeerarka wadanka udagsan
B. In uu lasocdo hadba arimaha taagan , ogyahayna , aragtiyada siyaasadeed ee wadanka kajira .
C. Waa in uu yahay geesi aan kabaqayn , natiijada kadhalan karta hadalkiisa .



D. Waa in uu aad uga fogaadaa xanaaqa , iskuna dayaa in uusan wax caadifaa uusan muujin .

**4. Khudbadaha militariga**

Telegram @SOMALIBOOKS

Waa khudbadaha laga hor akhriyo ciidanka waxayna caan kuyihiin , in aad xooga loosaaro , kor uqaadista dareenka iyo hididiilaha ciidanka , laguna dhiiri galiyo in ay si wanaagsan uga soo baxaan shaqada loo igmaday .

Hadaba qofka jeedinaya khudbadaha noocaasa maxaa laga rabaa ?

A. In uu ku abuuro jeclaysiinta wadanka .
B. In uu aad udareensiiyo dhibaatooyinka uu cadowgu ku hayo dadka iyo wadanka , kuna abuuro nacayb cadow .
C. Waa in marka uu jeedinayo khudbadda uu ujeediyo si ay kujirto xamaasad siyaada codkana uu kor uqaado .
D. Waa in ay tahay mid muuqata oo qodobaysan .
E. Waa in ay koobantahay , ujeedooyin gaar ahna

@SOMALIBOOKS

xambaarsan tahay .

Noocyada khudbadauhu waa badan yihiin laakiin shantaas aan kor kusoo sheegay baa ugu caansan ,

Marhadaan ogaanay inta loo qaybiyo khudbadaha iyo sidoo kale ujeedooyinkooda , waxaanu guda galaynaa sidii aad udiyaari lahayd khudbad , qiimo leh .



Telegram @SOMALIBOOKS

**Muumulista waqtiga**

Ilaalinta waqtiga , waa qayb kamid ah astaamaha lagu yaqaan umadaha ilbaxa ah , islaamkuna aad buu udhiiri galiyay in qofka muslimka ahi ilaaliyo waqtiga , hadaba muhiimad intee le'eg bay uleedahay qofka xog meel kajeedinaya , in uu ilaaliyo waqtiga ?



Haddii aan ukala qaadno labo qaybood , oo kala ah ilaalinta waqtiga ay xogjeedintu bilaabanayso , iyo ilaalinta waqtiga inta ay xogjeedintu socoto .

Saan ognahay xog kasta

Saan ogtahay xog kasta oo meel laga jeediyo waxay leedahay , waqti ay bilaamato iyo waqti ay dhamaanayso , hadaba qofka isaga ayay kasaarantahay , in uu yimaado goobta uu wax kajeedinayo , xiligii loogu talagalay isagoon kasoo hormarin kana dib dhicin , isaga ayaa laga rabaa in uu kasoo baxo hoygiisa waqti fiican oo uu ku imaankaro goobta xogjeedinta , isagoon daalanayn soo ordin , si daganaasha ah ku yimid.

Laakiin qaabkeebaad u ilaalinkartaa waqtiga inta ay xogjeedintu socoto ,



Telegram @SOMALIBOOKS

Taasi waa midda ugu daran oo inta badan ay adagtahay in aad is la ekaysiiso waqtigii laguugu talagalay iyo nuxurka xogjeedinta .

Ogowna xogjeedinkasta waxaa lagu qiimeeyaa, hadba sida uu umaamulo waqtigiisa, tusaale ahaan haddii aad waqtigii xogjeedinta aad kubixiso sheekooyin dhaadheer ama doodo , waxay dhaawac wayn gaysanaysaa sumcadaada ,

Hadaba si aad umaamusho waqtiga xogjeedinta raac talooyinkaan hoos kuqoron .

1. **Raac talooyinkaan muhiimkaa** [18]

- Hadii ay tahay meesha aad kahadlayso xaflad ama kulan kalmad gaara lagaa siiyay hadii aanan waqti laguu qaban waa inaadan 20 daqiiqo marna kabadsan .

@SOMALIBOOKS

- Hadii ay tahay xogjeedinta waa inaysan kabadan saacad .
- Hadii ay tahay tababar , waqtigeedu waxa uu ku xiran yahay inta uu tababarku soconayo laakiin waxaa muhiima in aad halkii sacba aad qaadato waqti nasiino ah adi iyo dhagays tayaashaadaba .
- Jooji hadlkaaga hadii aad mowduucii dhamaysay xataa haduu kuusoo haray waqti .
- Iskuday in aad dhamayso waqtigii dhamaadka kahor .

[18] Qaabka ugu fiican eel wax loo jeediyo , tix raac hore , bayjka 65



Telegram @SOMALIBOOKS

**2. Side baad uqaybsanaysaa waqtiga xogjeedinta** [19]

Xogtu waxay noqon kartaa mid koobaan oo ugu badnan 30 daqiiqo ah ama mid dheer oo ugu badnaan 60 daqiiqo ah .

B. **xogjeedinta kooban (30 daqiiqo ugu badnaan )**

| **Waqtiga** | **Qaybaha xogjeedinta** |
|---|---|
| 1-5 daqiiqo | Fur furashadii ( yoolka xogjeedinta , iyo qaybaha ugu muhiimsan |
| 5-25 daqiiqo | Guda gal xogtaada adoo qaybaha u qaybiniya waqtiga. |
| 25-30 daqiiqo | Gaba gabadii |

1. **xogjeedinta dheer ( 60 daqiiqo ugu badnaan )**

| **Waqtiga** | **Qaybaha xogjeedinta** |
|---|---|
| 1-5 daqiiqo | Fur furashadii ( yoolka xogjeedinta , iyo qaybaha ugu muhiimsan |
| 5-6 daqiqo | Guda galka mowduuca |
| 6-50 daqiiqo | Qaybihii xogjeedinta adoo markasta usii qaybinaya inta mowduuc ee ay ka kooban tahay xogtu . |
| 50- 60 daqiiqo | Waa gaba gabadii xogta |

[19] Isla tixraacii hore bayjka 67

Telegram @SOMALIBOOKS



**Hugga iyo ilaalinta muqaalkaaga**

Huggu waxa uu kamid yahay , waxyaalaha ka qayb qaata in uu kor uqaado kalsoonidaada , maxaayeelay waa hadii aadan raali ka ahayn qaabka aad usoo labisatay , ama aadan si wanaagsan isku soo qurxin , waxaad inta aad xogjeedinta jeedinayso aad kawal walaysaa in la arko ceebaha labiskaaga ee aad qarinaysay taasina waxay keeni kartaa in qayb badan oo maankaaga ah in aad kubixiso sidii aad uqarin lahayd ceebahaas , taasina waxay khalkhal ku keenaysaa , kalsoonida naftaada aad ku qabto , iyo in ay cabsi aad xogta lawadi waydo

@SOMALIBOOKS

lawadi waydo .

akhriste waxaad ogaataa in dadwaynuhu , gaar ahaan soomaalidu ay aad udanayso muuqaalka sare , oo waxaa laga yaabaa in dadka qayb kamid ah markay muuqaalkaaga arkaan , in ay kaala noqdaan kalsoonidii ay kuu qabeen , oo xataa hadii aad wax nuxur leh soo diyaarisay ay san dhag jalaq usiin .

laakiin waxay su'aal kataa gantahay labiska quruxda leh waa labis nooceeya?

Inta aanan su aashaas jawaabteeda aan isku dayin , waxaad ogaataa diinta islaamku , waxay udajisay labiska shuruudo dhowra oo ay waajib tahay in laga helo mara kasta oo aad xira nayso , shuruudahaasina waa sidaan .

Telegram @SOMALIBOOKS



1. In ay maradu tahay mid aan kugu dhagnayn , aadna kaaga balaarnayn .
2. In ay maradu aysan kasamaysnayn xariir ama dahab .
3. In ay tahay mid qarinaysa cowradaada .
4. In aysan ahayn maro khafiif ah oo cawradii banaanka usoo baxayso .
5. In aysan ahayn maro u eg dhar ay qaataan qayb gaar ah oo kamid ah gaalada , sida kuwa kaniisadaha ,kuwa fanaaniinta , iwm
6. In aysan ahayn gabadhu xiran dharka ragga , wiilkuna

6. In aysan ahayn gabadhu xiran dharka ragga , wiilkuna xiran dharka dumarka .

Intaa hadii laga helo dharkaaga waad kasoo baxday amarkii diiniga ahaa intaas wixii kadmabeeya qofkasta isaga ayaa yaqaan waxa quruxda u ah laakiin meelkasta waxaa kajira qaab labis oo bulshada dhexdeeda caan ku ah , akhriste si aad u ilaaliso quruxdaada waa in aad ku dadaashaa :-

- Nadaafada , oo aadan imaan xogjeedinta adoo dhididaya ama ay wasakhi kamuuqato jirkaaga .
- Udkoonka waa in uu jirkaagu iyo waliba dharkaaguba ay udgayaan .
- Waa in maryaha aad xiran tahay ay dhasqan yihiin , feeraysan yihiina
- Waa in aadan xirnayn maro aad kaaga wayn ama kugu dhagan ,

Telegram @SOMALIBOOKS




- Waa in aad ilaalisaa dhaqanka meesha aad kasoo jeedinayso xogta , hadii mawduuca aad kahadlayso uu doonayo dhar gaara sida lagu yaqaan meeshaas , mar hadii uusan ka hor imaanayn sharciga waa in aad ilaalisa , waayo waxay dhalinaysa kalsooni dheeraada adi iyo dhagaystahaaga .
- Isku day in aad cid aadku kalsoontahay waydiiso qaabka labiskaaga , hadii ay suuragal tahayna waa inuusan noqon

@SOMALIBOOKS

qof kamida dadka aad xogta ujeedinayso .

Telegram @SOMALIBOOKS



# Cutubka 3aad

# Diyaarinta xogta

Telegram @SOMALIBOOKS



**Hordhac**

Akhriste waxaan labadii cutub ee hore aan kusoo sheegnay qaabkii aad iskugu diyaarin lahayd xogjeedinta , hadda waxaa lasoo gaaray sidaad uqori lahayd , xogjeedinta nuxur leh oo

@SOMALIBOOKS

soo jiidata cidkasta oo dhagaysanaysa , waana qaybta ugu muhiimsan , ee uu qofku kunoqon karo aftahan , sikasta oo aad hadalka u taqaan hadii aadan waxa aad jeedinayso aysan nuxur lahayn cidanna ku dhagaysan mayso ,

Waxaan cutubkaan xoogga kusaari doonaa qaabkaad udiyaarin lahayd xogjeedinta nuxur leh , laga bilaabo cin waankeeda ilaa , qaybaha ay ka kooban tahay , iyo wadooyinka aad umari lahayd .

Waxaan sidoo kale aan kaga hadli doonaa cutubkaan , qaabka ugu haboon ee aad udiyaarin lahayd xogjeedinta yar hadana xambaarsan macno wayn .

Inta aad cutubkaan kujirto waxaad si fiican aad uga bogonaysaa mowduucyadaan soo socda .

Telegram @SOMALIBOOKS

- Qaabka ugu fiican aad udooran karto xogjeedinta cinwaan soo jiita dhagaystayaasha .
- Qaybaha ay xogtu ka koobantahay
    1. Hordhaca
    2. Mowduuca
    3. Gunaanadka



- Iyo sida aad udiyaarin lahayd qaybahaas aan kor kusoo sheegay

Waxaan rajaynayaa inta aad ku jirto cutubkaan in aad sifiican uga faa idaysan doonto haduu aale idmo .

**Qaabka ugu fiican aad udooran karto xogjeedinta cinwaan soo jiita dhagaystayaasha .**

Cinwaanka xogta aad jeedinayso waa qaybta ugu muhiimsan ee cidda aad ugu talagashay ay kugu qiimaynayaan , waayo waa qayvta ugu horaysa ee kudhacaysa dhagaha cidda ku dhagaysan doonta , waxaana lasheegaa in inta badan dadku ay saamayn ku yeelato cinwaanka xogta , oo dad badan oo hadii aysan cinwaanka maqleen ay suura gal ahaan lahayd in ay kasoo qayb galaan , sababtuna waa in uu cinwaanku ka tarjumayo , nooca ay xogjeedintaadu ahaanayso iyo waxa ay kahadlayso .

Telegram @SOMALIBOOKS

Hadaba waa in aad si wayn uga taxadartaa cinwaanka xogjeedintaada , oo aad xoogga saartaa sidii aad udooran lahayd cinwaan soo jiita cidkasta oo maqasha , waa in aad ku dadaashaa , in uu cinwaankaagu kajawaabo su aalkasta oo uu qabay cidda diyaarka u ah in ay goob jog ka ahaato madasha aad kahadli donnto .

Hadii cinwaankaagu qancin waayo dhagaystiyaashaadu waxay dhuminaysaa ama hoos idhigaysaa kalsoo nidii ay kuu



qabeen taasoo ku keeni karta in uusan imaan ama uusan siin

@SOMALIBOOKS

muhiimad gaara , xattaa haduu yimaado , waxaa laga yaabaa in uusan sifiican udhagaysan , waayo waxa uu naftiisa usheegay in aadan meesha waxba ku ahayn .

Hadaba si aad udoorato cinwaan qurux badan raac talooyinkaan soo socda

❖ **Ha ahaado cinwaankaagau qaab su aaleed** [20]

Waayo waxay unoqonaysaa xayaysiin oo kale oo qofkasta oo maqla waxa uu aad iskugu dayayaa in ogaado ama raadiyo jawaabta su'aashaas , ugu dambayntiina waxa uu ku qasban yahay in uu kasoo qayb galo xogjeedintaada , waxaa laga yaabaa in aad aragto in inbadan oo kamida qoraayada qora buugaagta kahadla hormarinta bulshadu ay adeegsadaan qaab su'aaleedka tusaale ahaan bal ufiirso canaawiintaan

Telegram@SOMALIBOOKS

- ✓ **Muxuu ugariiray carshiga ilaahay** [21]
- ✓ **Islaam baan ahay maxaan ula jeedaa** [22]
- ✓ **Muslim manahay** [23]

---

[20] لقاء الجماهير ، د.اكرم رضا ، دار التوزيع والنشر ، طبعة 1 ، 2001 ، ص 136 (lakulanka jamhuurka , qore dr.akrim rida, bayjka 136 )

[21] Waa muxaadaro uu leeyahay caaid al qarani sidoo kale waxaa mid lamida leh akrim ridaa waxayna kahadlaysaa taariikhda sacad bin mucaad .

[22] Waa kitaab uu leeyahay sheikh fatxi yakun waxa uuna kahadlayaa waxa laga rabo qofka muslimka ah

[23] Waa kitaab uu leeyahay sheikh maxamed qudub oo isna kahadlaya astaamaha qofka muslimka ah

Sidaad arkayso dhamaan canaawiintaas waxay xambaarsanyihiin su'aal aad jawaabteeda helayso markaad akhriso ama aad dhagaysato . waana kutubta loogu iibsi badan yahay aduun waynaha islaamka .

❖ **Iskuday in uusan kabadnaana sadex kalmadood .**[24]

Lama rabo in cinwaankaagu isku badalo xogjeedinta oo ay ku adkaato qofkii maqlay in uu qofkale ugudbiyo , hadii aad cinwaanka xogjeedintaada uu aad ubato waxaa adkaanaysa in laxifdiyo , oo ay dhacdo dadbadan oo iloobay cinwaankii xogta ay kasoo qayb galaan , taasina ay ku keento dhib dhanka lasocodka xogjeedinta .

Tusaale ahaan hadii aan cin waan uga dhigi lahaa buuga aad hadda akhrinayso " qaabkii aad udiyaarin lahayd xogjeedinta soo jiidata dadka ku dhagaysanaya " soo kugu ma adkaateen in aad xifdiso cinwaanka buugga ,

❖ **Adeegso tirooyin .**[25]

In aad cin waan kaaga aad kudarto tirooyin waxay kuu sahlaysaa in aad warbixin kooban kasiiso cidda aad ugu talagashay in ay ku dhagaysato ,

Telegram @SOMALIBOOKS

---

[24] كيف تحضر محاضرة ، يونس عبد الرب ، ( side baad udiyaarin kartaa muxaadaro , qore yoonis cabdi alrab , kadaalaco http://www.twhed.com/vb/t2736.html )
[25] Isla tixraacaan

@SOMALIBOOKS

Tusaale ahaan cinwaankaan " sadexda dariiqo ee quraanka loo xifdiyo " wuu kafiican yahay cinwaankaan " qaabka loo xifdiyo quraanka " waayo isla markiiba waxaa ku soo jiidanaya in ay jirto sadex dariiqo oo aad quraanka ku xifdin karto . meesha cinwaanka labaad ay maskaxdaada kusoo dhacayso , su'aalo badan .

Akhriste way jiraan qaabab kale oo loo diyaariyo cinwaanka , isku day in aad la imaato adi laftigaagu qaab kale oo habaysan .

**Qaybaha ay xogtu ka koobantahay**

Telegram @SOMALIBOOKS

Muxaadara kasta ama bug gasta ama wax walba oo aad bulsho ujeedinayso , waxa ay ka koobanyihiin sadex qaybood oo kala ah

- Hordhaca
- Gudaha
- Gunaanadka

Hadaba side baan udiyaarin karnaa qaybahaas ay ka koobantahay muxaadaradeenu .

## ❖ Hordhaca [26]

Hordhaca waa furaha xogtaada hadii aadan soo bandhigin hoprdhac fiican , waxaa dadka ku adkanaaya in ay fahmaan , qaybaha kale ee hadalkaaga , hadaba muhiimadda uu hordhucu leeyahay waxaa kamdi ah :-

- Waxay baraarujinaysaa cidkasta oo siijeeda
- Dhagaystaha waxay usheegaysaa in ay xogjeedintii bilaabatay .
- Waxay cadaynaysaa qodobada laga hadli doono
- Waa meesha ugu horaysa ee uu dhagaystuhu kaa qiimayn doono

Telegram @SOMALIBOOKS

**Hadaba maxaa lagu gartaa hordhaca fiican ?**

Hordhaca fiican waxa uu leeyahay tilmaamo badan waxaase kamid ah :-

- Waxa uu adkaynayaa xiriirka adiga iyo dhagaystiyaashaada .
- Waxa uu jabiyaa cabsidii aad qabtay .
- Waxaa uu dhagaystiyaasha usheegaa qaabka aad wax ugudbin lahayd iyo qaabka su'aalo laguu waydiin lahaa

[26] مهارات الالقاء المؤثر ، د.سوسن احمد المعلمي ، ( xirfadaha wax jeedinta xiisa leh , qore diktoorayso suusan axmad almucalimi , kadalaaco http://www.kau.edu.sa/Files/0010728/Files/24321_%D8%A7%D9%84%D9%85%D8%

@SOMALIBOOKS
AD%D8%A7%D8%B6%D8%B1%D8%A9%20%D8%A7%D9%84%D8%AB%D8%A7%D9%85%D9%86%D8%A9.pdf



- Waa in ay u qoron tahay qaab fudud oo dadku fahmayaan oo aadan kubadain suugaanta .
- Waa in aad kusheegtaa ujeedada khudbadda .
- Waa in ay koobantahay oo aysan qaadan waqtigii muxaadarad .
- Waa in ay kujiraan suugaanta noocyadeeda kala duwan .
- Waa in aad ku bilowdaa mahadnaqa eebe iyo saliga rasuulka .
- Waa in aad umahad celisaa cidkasta oo gacan ka gaysatay .
- Waa in aad sigaara ugu mahad celisa goob jooga yaasha kasoo qayb galay kulanka . una sheegtaa in ay muhiim yihiin .
- Waa in aad hordhaca aad xifdisan tahay oo aadan warqad ka aqrin .
- Iska ilaali in aad cududaaro bixiso sida waan kaxumahay in aan idiin soo jeedin waayo xog fiican , waqtiga ayaa igu yaraa , xogtu saad moodaysan manoqon doonto , iwm .

### ❖ Gudaha moduuca

Mowduuca xogtu waa qaybta ugu muhiimsan ee qaybaha xogta waana sababta ay dadku iskugu yimaadeen

Telegram @SOMALIBOOKS

xogta, waana sababta ay dadka iskugu yimaadeen , waxaadna ogaataa qofkasta oo meesha fadhiya ama



codkaagu gaarayo , in uu kaa sugayo in aad warbixin uu ku qanco kasiiyo cinwaanka aad dooratay .

**Hadaba si aad udiyaariso mowduuc nuxur leh raac talooyin kaan soo socda** [27]

Telegram @SOMALIBOOKS

- Raadi intii aad awood buugaagta wax ka qortay mowduuca aad kahadlayso .
- Iskuday in aad sifiican u akhriso buugaagtaas , adoo marwalba qoranaya qaybaha aad isleedahay way kamid noqon karaan xogjeedintaada .
- Raadi daliil kasta oo kusaabsan mowduucaaga , ha ahaado daliilkaas mid quraanka , ama xadiiska , waayo aad ayuu usoo jiidanaya dadwaynaha .
- Sidoo kale kusuugay mowduucaaga sheekooyin , dhacdooyin dhacay , iyo kuwa qosol leh , laakiin waa in ay xiriir la leeyihiin mowduuca aad kahadlayso .
- Qor cinwaanada aad isleedahay waad kahadlaysaa adoo kaashanaya ujeedooyinka aad kaleedahay xogjeedintaada .
- Marka hore wax kasta oo maskaxdaada ama aad meel ku aragto oo mowduucaaga xiriir laleh qor .
- Kadib daabac oo akhri adoo markaas ku samaynaya

@SOMALIBOOKS

- Kadib daabac oo akhri adoo markaas ku samaynaya , badalid oo wixii aad aragto in aysan faa ido badan lahayn kasaaraya , wixii badal ubahanna badalaya .

[27] side baad udiyaarin kartaa muxaadaro , qore yoonis cabdi alrab , tixraac hore



- Sidoo kale xooga saar in ta aad akhrinayso in aad kasaarto wixii qald oo dhanka luuqadda ah .
- Kadib halmar marlabaad akhri adoo hubinaya in wax kasta meeshii ku yaalaan .
- Hubi in waxaad qoraty iyo waqtiga aad haysato in ay isleeyihiin .

Telegram @SOMALIBOOKS

Hadaba waxaa lasoo gaaray in aad muxaadaradii aad diyaarisay aad si rasmii ah aad uqorto . , talooyinkaanna raac si ay howshaas kuugu fudu daato .

- Waa in aad adeegsataa kalmado fudud oo dadku fahmayaan .
- Warqadda aad adigu wax ka akhrinayso isku day in ay waa wayntahay oo aad sifiican uga arki karto , sidoo kale sadaraduna ay kala fog yihiin .
- Hadii aad adeegsanayso pro jeg ter iskuday in aad iska qurxiso adoo kashanaya qof ku fiican programka “ power pointiga “ iyo kuwa lamidka ah .
- Ha iloobin in aad usamayso warqadaha tirooyin taxana ah si aysan isaga kaa daba marin .

- Ha isku dhajin warqadaha aad wax ka aqrinayso .
- Waa in aad galisaa warqadaha boqshad si aysan uwasakhoobin ama aysan kaa kala yaacin .
- Ogow halkii warqad waxaa lagu akhrin karaa cel celis ahaan 7 daqiiqo .



- Ugu dambayntii isku day in aad dusha ka xifdido , hadii kale ku badi akhrinta oo carbkaaga sifiican ha ujil ciyo .

Telegram @SOMALIBOOKS

**Tilaamaha mowduuca fiican .** [28]

- hodon tinimadeeda
- kala duwanaasha heeda
- ujeedadadeeda oo cad
- in aysan dug ahayn oo warbixinteedu tahay wax cisub .
- in ay fudutahay oo aaan lagu qorin luuqad adag .
- in aykoobantahay oo aysan ahayn mid dheer oo bilaa nuxura ama aad ukoobvan , oo bilaa faa ido ah .
- waa in ay daboolaysaa baahida goob joogayaasha .
- qaab qurux badan oo loo soo bandhigo .
- luuqadda ay ku qoron tahay oo ah mid sax ah .

@SOMALIBOOKS

📖 in ay ku haboon tahay cidda loo jeedinayo .

📖 in ay leedahay laylisyo ama waydiimo .

📖 in ay ku haboon tahay waqtiga loogu talagalay .

[28] مهارات الإلقاء والعرض وتدريب المدربين ، التقديم : مركز التفكير الابداعي , ( xirfadaha wax jeedinta , iyo tababarka, taba barayaasha , waxaa soo ban dhigay , xarunta "al tafkiir al ibdaacii "



Telegram @SOMALIBOOKS

📖 in ay kawada qayb qaadanayaan jeediyaha iyo dhagaystahaba .

Aftahan adaa lagaa rabaa in aad muujiso dadaal dheeri ah , si aad usoo bandhigto , xogjeedinta , inbadan ka guuxda dhagaha dhagaysti yaashaada .

❖ **Gunaanadka**

Gunaanadku waa fariin aad udirayso dhagaystiyaashaada , in ay muxaadaradii dhamaatay , waxaana muhiim ah in aysan kabadan laba daqiiqo ilaa shan daqiiqo ugu badnaan .

Ogow gunaanadku waa jaanis labaad oo aad ku ku kasban karto dhagaystahaaga , waayo waa ereyada uu hadhow xasuusan doono , waxaa laga yaaba in uu iloobo qayb kamid ah xogjeedinta laakiin marna iloobi maayo gunaanadka .

Bal ufirso quraanka iyo aayadaha uu ilaahay kusoo

gunaanado suuradaha .

1. Ilaahay waxa uu uga hadlay suuradda sulsilad qiyaamaha iyo dhacdooyin kiisa , hase ahaatee waxaa lagu soo xuriyay aayad kulan sanaysa macnaha aayadihii hore oo ah “ فَمَنْ يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ خَيْرًا يَرَهُ (7) وَمَنْ يَعْمَلْ مِثْقَالَ ذَرَّةٍ شَرًّا يَرَهُ (8) “ oo



Telegram @SOMALIBOOKS

tafsiirkeedu yahay “ ruuxii waxyar oo khayra fala wuu arkayaa , kiise wax yar oo shar ah fala wuu arkaya “ [29]

2. Sidoo kale waxa uu ilaah kusoo gunaanaday suuratta ibraahim ayaadaan oo macna wayn xambaarsan "هَذَا بَلَاغٌ لِلنَّاسِ وَلِيُنْذَرُوا بِهِ وَلِيَعْلَمُوا أَنَّمَا هُوَ إِلَهٌ وَاحِدٌ وَلِيَذَّكَّرَ أُولُو الْأَلْبَابِ " oo tafsiir keedu yahay “ quraankana waa gaadhsiin dadka iyo in looga digo iyo in ay ogaadaan , in eebe ilaah kaliya uun yahay , iyo inay waan towdo cidda caqliga leh” [30]

**Tilmaamaha gunaanadka xun**

- Sheeko dheer
- Ila qosol aan xiriir la lahayn mowduuca
- In aad kusoo cel celiso kalmadda “ ugu dambayntii “ iwm
- Inaad dhahdo waxaan hayay intaas ayay ahaayeen

@SOMALIBOOKS

- Inaad dhahdo waxaan hayay intaas ayay ahaayeen .
- In aad kusoo cel celiso iga raali ahaada .
- In aad bilowdo mowduuc aadan waqti u hayn .
- In yasto ama liiddo awoodaha dhagaystiyaashaada .
- Su'aalo iyo jawaabo in aad kusoo xirto .
- In aad sheegto in aad waxbadan katagtay .

[29] Kitaabka turjumidda quraanka kariimka , ee uu turjumay sheikh maxamuud maxamed cabdi , daabacdayna madbacdda fahad ee daabicista quraanka kariimka . bogga 858

[30] Isla tixraacii hore bogga 347



Telegram @SOMALIBOOKS

**Hadaba qaab keeba ugu fiican in aad kusoo gunaanado xogjeedintaada.** [31]

- In aad kubeegto xilli ay dadku baraarugsan yihiin .
- In aad kusoo koobto wixii aad kasoo hadashay muddo aan kabadanayn sadex daqiiqo .
- Waxaad kusoo gaba gabayn kartaa aayad quraana ama xadiis , ama gabay kooban , ama sheeko kooban oo xiriir laleh barnaamijka .
- Mahadcelin dhagaystiyaasha kaliya .
- Waa in aad ku dadaashaa in aad ku gabagabayso hadallo farxad leh .
- Iyo in aad iska ilaaliso tilmaamihii xumaa ee aan kor kusoo sheegay .

sheegay .

[31] المتحدث الجيد ، أ.د عبدالكريم بكار ، دار السلام ، 2010م ، ص 193 ( jeediyha fiican , prof.cabdikarim bakaar,waxaa daabacay madbacadda daarusalaam , sanadkii 2010 m , bogga 193

Telegram @SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS



# Cutubka 4aad
# Jeediinta wanaagsan ee xogta

Telegram @SOMALIBOOKS



## Hordhac

Waxaan akhriste cutubyadii hore kaga soo hadalnay , qaabkii aad udiyaarin lahayd xogjeedinta nuxur leh , oo soo jiidata cidkasta oo maqasha .

Sidoo kale waxaan kasoo hadalnay , shaqooyinka aad qaban lahayd intaadan diyaarin xogjeedinta.

Hadaba , hadda waxaa lasoo gaaray xiligii aad wixii aad diyaarisay aad gudbin lahayd .

Ogow sikasta oo aad udiyaariso xogjeedinta nuxurleh , hadii aadan ugudbin qaab heer sare ah , waxaad soo diyaarisay waxay noqonayaan waxba kama jiraan .

Akhjriste waa in aad ogaataa in gudbinta fiicani ay kaqaadato qayb muhiim ah kalsoonida ay kuu qabaan dhagaystiyaashaadu , sidoo kale waxaad ogaataa , hadii aadan si wanaagsan xogta usoo bandhigin , in ay keeni karto in aadan helin jaanis labaad oo aad kumuujiso in aad tahay aftahan .

Hadaba cutubkaan waxaan ku soo bandhigi doonaa qaabka ugu haboon ee aad ugu soo gudbin karto dhagaystiyaashaada muxaadaradii aad soo diyaarisay .

Inta aan cutubkaan ku jirno waxaan kahadli doonaa qodobadaan soo socda .

Telegram @SOMALIBOOKS



- Arimo muhiima in aad samayso inta aadan waxba jeedin
- Waxyaalaha muhiimka ah ee laga rabo meesha aad wax kajeedinayso
- Cabsida iyo sida aad uga adkaan lahayd .
- Hadalka iyo qaabka aad uwanaajin lahayd
- Luuqadda jirka iyo sidaad u adeegsan lahayd
- Qaabka aad umaamuli lahayd dooda inta aad xogta jeedinayso jeedinayso .

@SOMALIBOOKS

- Talooyin ku aadan qaabka loo adeegsado qalabka wax lagusoo bandhigo .
- Tilmaamaha  dadka aan ku fiicnayn soo jeedinta .
- Gafafka inta badan ay lakulmaan aftahanadu iyo sida aad uga hor tagi lahayd .

**Arimo  muhiima in aad samayso inta aadan waxba jeedin** [32]

Inta aadan bilaabin jeedinta xogjeedintaada , waa in aad noqotaa mid u diyaara , wax jeedintaas caqli iyo jir ahaanba , hadaba raac talooyinkaan hoos kuqoron si aad ubilowdo xogjeedintaada adoo faraxsan .

- Naftaada diyaar ha u ahaato , ilaahayna ukhaalis yeel una niyayso in aad ilaahay dartiis aad shaqadaan uqabanayso.
- iaahayna talo saaro , waayo sikasta oo aad isku diyaariso hadaadan ilaah tala saran waxba kuu hagaagi maayaan

Telegram @SOMALIBOOKS

[32] xirfadaha wax jeedinta , iyo tababarka, taba barayaasha , waxaa soo ban dhigay , xarunta "al tafkiir al ibdaacii



- Ogow in shaqada wax jeedinto aysan ahayn wax hooseeya ee ay tahay nimco ilaahay kugu manaystay , oo khasab kaaga dhigaysa in aad umahadceliso .
- Ku kalsoonow awoodaha ilaahay kusiiyay adoon xad gudbayn ,
- Dooro meel fiican oo qabow oo dadka oodhan ay kaa arkayaan , hadii dadku si khaldan ufadhiyaana , isku day

adoo ku xisaabtamaya waqtiga aad haysato in aad sifiican ufariisiso .

- Waqtiga aad wax jeedinayso hanoqdo mid ku haboon , kuna dadaal in aadan kasoo daahin waqtigii laguugu talagalay .
- Kafogow in aad cabto cabitaan aad uqabow daqiiqadaha kahoreeya wax jeedinta , sidoo kale kafogow in aad isla daqiiqadahaas wax soo conto, waayo waxay keeni kartaa in aad caajisto .
- Soo waysayso inta aadan waxba jeedin , soona xiro dhar qurux badan , isna soo carfi .
- Seexo ugu yaraan 30 daqiiqo kahor waqtiga muxaadarad , taasi waxay kaa kaalmaynaysa in aad dajiso , dareenkaaga , maskaxdaaduna ay diyaar unoqoto in ay qanciso tiro dada , lana dhaqanto caqliyo iyo dhaqamo kala duwan oo aad ugu tagi doonto goobta aad wax kajeedinayso .

Telegram @SOMALIBOOKS



Akhriste talooyinkaas iyo kuwa kalaba waxay kaa kaal maynayaan , in aad bilowdo xogjeedintaada , adoo diyaarsan , dareemayana dagaanasho sare.

Waayo hadii aadan dareemayn dagaanasho waxay kugu

@SOMALIBOOKS

keeni kartaa in aad wadi waydo muxaadarada , oo maankaagu kufurmaan arimo kale oo kaa mashquuliya xogta.

Kudadaal in aad adoo diyaara imaato goobta xogta .

Telegram @SOMALIBOOKS



**Waxyaalaha muhiimka ah ee laga rabo meesha aad wax kajeedinayso:-**

Qaacada ama goobta aad



kajeedinayso xogta waa in ay tahay goob udiyaarsan shaqadaas ,



Ugowna goobtu qayb wayn bay kaqaatadaa in aad si qurxuxbadan aad usoo bandhigto xogtaaada ,

Hadaba waa maxay shuruudaha lagu xiro goobta ama qaacooyinka laga soo jeediyo xogjeedinta .

Shuruudahaas waxaa ugu muhiimsan :-

Telegram @SOMALIBOOKS

1. Waa in ay qaacadu tahay mid waasac ah oo qofkasta kusoo adaysa ($3m^2$) .
2. In aysan lahayn tiirar qarinaya aragtida .
3. If kufilan oo aan ahayn mid aad ubadan aana yarayna .
4. In ay kafogtahay jabaqda faraha badan sida matoorada guuxa baabuurta iyo iwm.
5. Hawo furan oo aan cabur lahayn .
6. In ay udgoon tahay .
7. In ay nadiif tahay .
8. In heerkulkeedu yahay dhexdhexaad (20 digrii )



9. Guraas dagan oo leh meel lagu tiirsado iyo gacmaha lasaarto , kuna filan tirade dadka lafilayo

@SOMALIBOOKS

10. Miis ku haboon hadba nooca xogta lajeedinayo.
11. Korontada meesha oo dhamaystiran sida bareesooyink
12. In qaabka fadhigu yahay mid haboon sida
    - A. In dhamaan kafaaidaystayaashu is arkayaan.
    - B. In uu ka faaidaystuhu arkayo soo jeediyaha
    - C. In uu ka faaidaystuhu arkayo qalabka bandhigista .
    - D. In uu soojeediyuhu arkayo kafaa idaystayaasha .
13. In laheli karo gaabayaasha xogjeedinta sida
    - A. Sabuuradda dhaqdhaqaaqda .
    - B. Looxa warqada ah ama filib jaartiga .
    - C. Qalimaan midabo leh iyo tirtirayaal
    - D. Boor kuqoronyahay qeexidda barnaamijka.
    - E. Makarafoon
    - F. Borojogtar
    - G. Kumbiyuutar
14. In shay walba uu yaal meeshii loogu talagalay .
15. Goob loogu talagalay warbaahinta oo aan dhib kukeenayn kafaa idaystayaasha .
16. in ay diyaar yihiin farsamayaqaanada qalabka .

Telegram @SOMALIBOOKS

qodobadaas waa kuwa ugu muhiimsan ee laga rabo qaaca kasta in laga helo , laakiin waxaa suura gal ah in qaybtood ay noqdaan kuwa aan la awoodin , laakiin waa in wixii la awoodi Karin lagu badalaa wixii suuragal ah.

**Cabsida iyo sida aad uga adkaan lahayd .**

Cabsidu waa shay dabiici ah oo kudhaca qofkasta oo bini Aadam ah , maahan wax dad gaar u ah , waxaadna ogaataa majiro qof aan wax kabaqin , sidoo kale waxaa dhacda in mararka qaarkood ay cabsidu fiicantahay , qofka muslimka ah waxaa waajib ku ah in uu kacabsado ilaahay subaxaanahu watacaalaa .

**Hadaba cabsidu qaabkee ayay ku dhacdaa [33]**

Dadka ku xeel dheer arimahaas waxay dhahaan cabsidu waxay kabilaabataa indhaha , oo arka goob joogayaasha , taasoo isla markiiba gudbisa warbixin ah in dadka meesha fadhiya iyo waxa aad soo diyaarisay aysan islahayn , isla xiligaas ayaa waxaa dhalanaya dareen , iyo maskaxdu ay soo xasuusato mararhore oo aad baqday intaad damacday in aad dad kahor hadasho , dareenkaas iyo wal wal kaas badan ayaa waxay kalifaysaa in ay maskaxdu amar siiso qanjirka kuyaal kilyaha dushooda , isna waxa uu soo daynayaa dheecaan loo yaqaan " ardaynaaliin" waana dheecaanka sababa , tilmaamaha lagu arko qofka baqa sida dhidid faraha badan , dhoonta oo qalasha , gariir ku yimaada lugaha iyo gacmaha mararka qaarkood .

Telegram @SOMALIBOOKS

---

[33] فن الاعداد والالقاء ، سامي بن خالد المحمود ، مكتبة صيد الفؤاد الاسلامية ، رابط التحميل ، http://saaid.net/gesah/sami/k/003.doc ( qaabka wax loodiyaariyo loona jeediyo , qore saami bin khaalid almaxamuud , maktabadda sayd alfu'aad al islaamiya waxaana kaheli kartaa wabsaydka maktabadda .

@SOMALIBOOKS

Laakiin waxaad ogaataa in ay howshaas soconayso sida caadiga ah muddo lix ilbiriqsi ah kadibna jirku uu caadi kusoo noqon , laakiin waxaa daran in aad marlabaad indhahaagu gudbiyaan aragti ah in ay arkeen wax wayn .

Taasina waxay siyaadin kartaa in uu socdo soodaynta dheecaanku waqti intii caadiga ahayd kabadan , oo laga yaabe in ay gaarto daqiiqado badan ,

Sabata  keenta in ay indhuhu gudbiyaan aragti noocaasa , waa in uu bini aadamku sida caadiga ah uu kabaqo waxa uusan aqoon , lagama yaabo in aad kabaqdo , in aad walaalaha ama saaxiibadaa aad isku xaafad tihiin hortooda aad ka hadasho .

Telegram @SOMALIBOOKS

Akhriste waxaa mudan in aan iswaydiino , cabsidu matahay wax laga gudbi karo , mise waa dareen qofka marwalba lasoconaya ??

Jawaabta su'aashaasi  waxaan rajaynayaa in aad sifiican ugaranayso , waayo majiro dhibaato ama cudur aan dawo lahayn ??

**Si aad uga gudubto cabsida raac talooyin kaan wax ku oolka ah**

Inta badan cabsidu waxay dhacdaa daqiiqadaha hore ee aad soo istaagto dadka hortooda , intaanan ugud bin talooyinkaas , waxaad inta aadan bilaabin xogjeedintaada

aad tala saarataa ilaahay subxaanahow watacaala , kadibna bilowdaa hadalkaaga .

Hadii aad dareento xoogaa cabsiya raac talooyinkaan muhiimka ah . [34]

- **Iskuday in aadan sitoosa ufiirin indhaha goobjoogayaasha**

Waayo , indhahu waa wadada kaliya ee gudbisa aragtida ay hadhow maskaxdu kushaqaynayso , si aadan udareemin wax cabsi ah waxaad isku daydaa in aad indhahaaga , inyar aad kor uqaado , iskana ilaali in aad fiiriso saqafka , taasoo keeni karta in lamoodo in aad kor wax ku aragtay , oo markaas dadkii kulasocday ay kaa mashquulaan , sidoo kale hadii uujiro dad aad garanayso ama aad aaminsantahay in aad ka aqoon badan tahay ama ay da' ahaan kaa yaryihiin waxaad inta ay cabsidu kaa ba ayso aad kubadisaa indhaha xagooda .

- **Adoon lagu daraymeen waxaad si tartiiba ufiirisaa warqadaha aad wax ka akhrinayso ama aalada wax soo bandhigaysa .**

Telegram @SOMALIBOOKS

[34] How to be abetter giving presentations , Michael stevens , printed : international ideas home , page 178 ( qaabkeebaad uhormarin kartaa awoodahaaga bandhigeed , qore miikhaaiil , istiifan , waxaa lagu daabacay madbacadda international ideas home , bogga , 178 ) waxaa buugg laga soo qaatay qodobada oo kaliya sharaxaadda taba

@SOMALIBOOKS
taal waa mid qoraaga ugaara .



Hadii aad dareento in wali cabsidii ku hayso adoon ku talax tagayn isku day in aad indhaha ku badiso dhanka warqadda ama qalabka xogta aad kusoo bandhigayso , taasina waxay kaa kaalmaynaysaa in aad dareento daganaasho , laakiin yaysan kuunoqon dhaqan oo manta oodhan warqadda kaliya wax ha ka aqrinin .

- **Cabaar yara hako ( ogowna hagashada noocaasi ay tahay wax dabiici ah )**

Telegram @SOMALIBOOKS

Sidoo kale waxaad samayn kartaa in aad xoogaa hakad galiso hadalkii aad waday , waa sikinno yar ugu badnaan hal daqiiqo taasina waxay kaa kaalmaynaysaa ,in aad dib maankaaga usoo celiso .

## Calaamadaha cabsida iyo sidii aad ula dhaqmi lahayd[35]

| **Calaamadda** | **Saad ula dhaqmi lahayd** |
|---|---|
| Dhididka | Ha ujoojin , dadkuna ujoojin maayaan |
| Wadna garaaca | Neef fiican qaado dadkana toos ha ufiirin |
| Afqalal | Hadlka tartiibi , biyo cantuug |
| Codkoo xabeeb yeesha | Kalmadaha qaybtood ku dheerow |
| Gacmaha oo ku gariira | Minbarka qabso ama shay isku tiiri |
| Neeftaada oo siyaado noqota | Joojo in aad afka kaneefsato |

[35] qaabka ugu wanaagsan ee wax loo jeediyo ) qore Dr. daariq alsuwaydaan, tixraac hore , bogga 118



## waa maxay sababaha keena in uusan qofku dadka hortooda kahadlin [36]

sababo madan baa jira waxaana kamid ah

1. Waxaan dhaho garan maayo
2. Daka ayaa igu qoslaya
3. Xogtaan horay uma soo diyaarin
4. Waan xishood badnahay
5. Hadalka ayaan shigshigaa ama waan carab la'ahay
6. Waan cabsadaa
7. Waan gariiraa
8. Waxaan iloobayaa waxaan dhihi lahaa
9. Dadku in ay wax iga sheegaan baan kabaqaa marka dhamaato xog jeedintu .
10. Goobjoogayaashu waa dad iga aqoon badan .

Telegram @SOMALIBOOKS

### Hadalka iyo qaabka aad uwanaajin lahayd

Codkaagu ama hadalku waa wadada ugu muhiimsan ee aad kugudbinayso xogtii aad soo diyaarisay , sidoo kale codka waxa uu suuq gayn ama xayaysiin u yahay xogtii aad soo diyaarisay kuna bixisay waqtiga badan , hadii aadan codkaaga usoo bandhigin si wanaagsan ee guruxbadan kuna

@SOMALIBOOKS

codkaaga usoo bandhigin si wanaagsan oo quruxbadan kuna haboon hadba nooca xogta aad jeedinayso waxaad ogaataa in aysan cidna dhag jalaq usiin xogtaas .

[36] Isla tixraacaan , bogga , 117



Tusaale ahaan hadii uu quraanka noo akhriyo nin xaafid ah oo aad uxifdisan laakiin aan codmacaanayn , taasoo keenta in aaysan wax saamayn ah nagu yeelan , laakiin waxaa hubaala in hadii qaari codmacaan oo aan tajwiidka kufiicnayn uu quraan noo akriyo in ay aad noosaamayso oo aan khushuucno .

Telegram @SOMALIBOOKS

Tusaalahaas waxaan kafahmi karnaa muhiimadda uu codku leeyahay .

Waxaa iintabadan la iswaydiiyaa codka karhimada malagu dhashaa mise waa labartaa ?

Aqoonyahanada ehelka u ah arimahaas waxay sheegeen in ay suuragal tahay in aad wanaajin karto codkaaga hadii aad waqti ku bixiso .

Nabiga “naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee” waxa uu ahaa mid kudadaala in uu deeqsiiyo codkiisa cidda dhagaysanaysa marka uu xog jeedinayo , waxa uuna ahaa mid hadba codkiisu lajaanqaadayo nooca xogta uu jeedinayo , waa sida uu soo wariyay saxaabiga way nee jaabir bin

c/laahi[37] “ **waxa uu aha rasuulka mid ay indhihiisu guduutaan marka uu khudbaynayo , codkiisa kor ayuu**

[37] Qeexidiisa



**uqaadi jiray .......”**[38] Waa marka uu lahadlayo ciidan sida kamuuqata qaybaha dambe ee xadiiska .

Telegram @SOMALIBOOKS

Hadaba akhriste si aad unoqoto mid deeqsiiya codkiisa dhagaystiyaasha , raac talooyinkaan soosocda .

1. **In aad lajaan qaado hadba nooca xogta aad jeedinayso**
   Tusaale ahaan hadii ay tahay xogtu mid kahadlaysa qiyaamaha iyo sidii la iskugu diyaarin lahaa , waxaa muhiim ah in aad uhadasho si dadka qiiro galinaysa , kuna abuuraysa cabsi ay kacabsanayaan naarta iyo hididiilo ay uqabaan janada , hadiise ay tahay mid ciidan ama dagaal waa in aad codkaaga kor uqaadaa oo aad xoogga saarta in aad kiciso dareenka ciidanka kuna beerto xaalad dagaal dareensiiso dhibta soo wajahaysa iyaga iyo wadankaba hadii aysan si sax udagaalamin .
2. **Waa in uusan codkaagu hal qaab kusocon**
   Waxaa loola jeedaa in aadan manta oodhan isxiiiin oo

@SOMALIBOOKS

aadan qaylin , ama manta oodhan aadan qiiroon , ee waa in aad codkaaga badashaa , oo xataa hadii aad lahadlayso ciidan , waa in aad mararka qaarkood aad

[38] Xadiiska sidaan ayuu uqoron yahay " «كان رسول الله -صلى الله عليه وسلم - إذا خطب احمرَّت عيناه، وعلا صوته، واشتدَّ غضبه؛ حتى كأنه منذر جيش يقول: صبَّحكم مسَّاكم..» أخرجه أحمد من حديث أبي ذر - رضي الله عنه - (185/5)، وصححه السيوطي في الجامع الصغير (7357) ثم الألباني في صحيح الجامع (5197).



kahadashaa guulaha ay gaareen adoo markaas adeegsanaya codod farxadeed , ama daganaasho , hadiise aad manta oodhan aad hal si uhadasho waxay daal ku keeni kartaa cidda kudhagaysanaysa .

3. **In aad ilaaliso xawaaraha codkaaga .**

   Waa in uu codkaagu ahaada mid dhex dhexaada ee aan boobsiis kujirin sidoo kale gaabis siyaadana kujirin , oo aad si dhex dhexaada u hadshaa .

4. **Waa in aad taqaan adeegsiga qalabka codka gudbiya .**

   Waxaa inta badan dhacda in ay ku adkaato xog jeediyaha , adeegsiga makarafoonka , oo uu afka kudhaweeyo taasoo keenta in aan waxba laga fahmincodkiisa , ama uu kafogeeyo oo aan lamaqlin codkiisa , mararka qaarkoodna waxaa laga yaaba in uu inta uu sixun uqabsado makaroofanka uu codkii ku yimaado kala go ama jabaq dhaliyo ,

   Waxaas oodhan waa in aad kataxadartaa oo aad

Telegram @SOMALIBOOKS

naftaada bartaa adeegsiga qalabka codka gudbiya , hadii ay kugu adagtahayna aad isku dayda in aad tijaabo samayso inta aadan xogta jeedin .

5. **Waa in aad kafogaataa waxkasta oo xiraya codkaaga .**
   Sida in aad badhanka shaatiga isku ceejiso , ama aad xog jeedinta kahor gasho dood dheer oo codkaaga xabeeb ku beeri karta , waxaa muhiim ah in aad kafogaato wax kasta oo codkaaga ku keeni kara dhib ama xabeeb .



Telegram @SOMALIBOOKS

6. **Iskaduub codkaaga inta aadan xogta jeedin .**
   Arintaas waxay kaa kaalmaynaysa in aad ogaato meelaha uu codkaagu kaxun yahay , sidoo kale waxay kaa kaalmaynaysaa in aad ugaato waqtiga ay qaadan doonto xogjeedin taadu .

Aftahan adaa lagaa rabaa in aad xooga saarto hagaajinta codkaaga .

**Luuqadda jirka iyo sidaad u adeegsan lahayd**

Luuqada jirka waa in uu qofku is waafajiyo hadalka iyo dhaqdhaqaaqa jirkiisa , ogowna luuqadda jirku waxay kaqabqaadanaysaa , in sifiican loo dhuuxo xogta aad jeedinaysid , imisaad aragtay qof meel ka khudbaynaya oo hadana aad moodo inuu caraysan yahay ama geed meel kabaxay oo manta oodhan aan kadhaqaaqayn meeshii uu

@SOMALIBOOKS

taagnaa markuu bilaabay hadalka .

In aad jirkaagu hadlo inta uusan afkaagu hadlin waxay kaqayb qaadanaysaa kalsoonida y kuu qabaan dhagaystiyaashaadu ,

Waa laga maarmaan in aad taqaan sida loo adeegsado luuqadda jirka , hadaba si aad uxoojiso arintaas raac talooyinkaan .

1. Soo istaag goobta hadalka adoo ku kalsoon naftaada faraxsanna



Telegram @SOMALIBOOKS

2. Dhoola caday adoon ku talax tagayn
3. Isku day in aad marba meel fiiriso oo aadan manta oodhan qayb dadka kamdia aadan fiirin .
4. Dhaqdhaqaaqa madaxaagu ha noqodo mid lajaan qaadaya hadalkaaga
5. Hadii ay suuragal tahay samay dhaq dhaqaaq adoo marba aadaya goob cusub .
6. Wanaaji adeegsiga gacanta , iskana ilaali in aad manta dhan hal dhaqdhaqaaq kusoo cel ciliso .
7. Iska ilaali in aad alaab badan gacmaha ku qabsato
8. Iska ilaali dhaqdhaqaaqa badan ee indhaha .
9. Habadin dhaqdhaqaaqa xad dhaafka ah .
10. Iska ilaali in aad samayso dhaqdhaqaaqyo dadka dhibaya sida in aad farahaaga sanka lagasho , ama

dhagta aad galiso .

Ogow in fariimaha uu jirkaagu udirayo dadka madasha fadhiya , ay hadhow kaqayb qaadanayso , aragitada lagaa qaadan doono ,

Waayo maskaxdu waxa ay intabadan kaydisaa , muuqaalada ay ishu qabato , waxaa dhici kara in uu qofku iloobo hadal aad maalin kutiri laakiin way adag tahay in uu iloobo in uu maalin uun ku argay , waa midda keenta in aan dhahno , hebelow waad igu sawiran tahay , ama meel uun baan kugu arkay .

Telegram @SOMALIBOOKS



Taasi waxay natusinaysaa in ishu ka xoog badan tahay dhagta , hadaba kudadaal in aad iskawanaajiso , tilmaamaha jirkaagu bixinayaan .

**Qaabka aad umaamuli lahayd dooda inta aad xogta jeedinayso**

Dood wadaagu waxay kamid tahay wadooyinka ugu fiican ee wax laisku fahansiiyo , waatuu yiri aftahankii jayniiska ahaa **koonfooshiyuus** “ dheh waan iloobin , itus lagayaabe in aan xasuusto , iwadaaji waan xasuusan “



Waxaan kafaa idayna

@SOMALIBOOKS



Waxaan kalaa idayna hadalkaas in dadku intabadan aysan iloobin shaqooyinkii ay kaqayb qaateen , sidoo kale waxaa lagu ogaaday daraasad laseemay in " dadku ay xasuustaan bil kadib 13% waxay maqleen meesha ay xasuustaaan 75% wixii ay arkeen sidoo kale waxay xasuustaan 95% waxay kaqaybqaateen .

Hadaba waxaa iyana la iskuwaafaqsan yahay hadii aan lamaamulin wadahadalka iyo doodaha in ay kadhalan karto isnacayb iyo kala fogaansho ,

Telegram @SOMALIBOOKS



Si ay unoqoto doodu mid mira dhasha waa in la ilaashaa waxyaalahaan soo socda .

1. In qofkasta lasiiyo jaanis oo aan laga dhex galin hadalka .
2. In qofkasta uu leeyahay waqti xadidan oo uusan dhaafi Karin .
3. In ay cadahay waxa laga doodayo .
4. In aan lagu jeesjeesin aragti qof muujiyay .
5. Kudhiiri gali in alaga qayb qaato dooda adoo iska ilaalinaya in aad qasab kadhigto .

6. Cadaalad same markaad qaybinayso waqtiga oo dadna waqti badan hasiin dadna haku yarayn .
7. Waqtigu haduu yaryahay isku day in aad 3 qof wixii kadambeeya aad joojiso dooda hadaysan jirin cid wax dheeraada kudaraysa .
8. Hadii qof uu kudheeraado hadalka kajooji si habaysan ida in aad soo koobto hadalkiisi ama aad qofkale utilmaanto hadalka ama kafaaidaysato meelaha uu hagadka galiyo .
9. Waligaa iska ilaali in aad lamuranto qof kamid ah kazoo qayb galayaasha , ama aad kahor imaato fikirkiisa .
10. Ogow dowrkaagu waa maamulista dooda ee maahan in aad jawaab kabixiso aragtiyada .

Telegram @SOMALIBOOKS



11. Hadii uu qof kamid ah kuwaydiiyo su'aal iskuday in aad dadka usoo bandhigto si ay uga qayb qaataan barnaamijka .
12. Ikudadaal in aad dadka ugu yeerto magacyadooda ama naynaasahan ay ogalyihiin .
13. Iska ilaali in laguu fahmo qof dadka oodhan kasareeya.
14. Iska ilaali hadalada kulul sida , istaag , hadal , waqtigii waa kaadhacay ,.
15. Su 'aalahaagu hanogdaan kuwo kooban

@SOMALIBOOKS

16.Iska ilaali in aad isa saarto jawaabaha su'aalihii lagu waydiiyay waayo qofkasta waxa uu jecel yahay in su'aashiisa gooni looga jawaabo .
17.Ugu dambayntii isku day in aad aragtiyada meel iskugu keento .
18.Hawaydiin su'aal qof aad ogathay in uusan kajwaabi Karin waayo waxay kunoqon culays.
19.Sifiican udhagayso qof dhiibanaya aragtida .
20.Ha umuujin qofka wax dareen ah oo muujinaya su'aal xumida .
21.Iska hubi in aad su'aasha sifiican ufahantay , waayo suaashoo aad fahantaa waa jawaabta barked .
22.Iskuday in aad kajwaabto dhamaan su'aalaha lagu waydiiyay haduu waqtigu byaryahayna kudadaal in ays su'aaluhuna yaraadaan .
23.Hadii aad dadaka uqaybinayso kooxo kooxo ilaali qodobadaan .

Telegram @SOMALIBOOKS



A. Waa in ay koox walba ka koobantahay ugu yaraan 3 qof ugu badnaana 7 qof .
B. Kooxwalba in loo ogolaado in ay doorato hogaamiyaheeda .
C. In waqtiga ay kooxdo ku soo bandhigayso aragtideeda uusan kabadnayn 5daqiiqo.

Telegram @SOMALIBOOKS



**Talooyin ku aadan qaabka loo adeegsado qalabka wax lagusoo bandhigo .**

Waayadaan dambe waxaa lagaaray hormar oo intabadan dadka waxsoo jeediya waxay adeegsadaan qalab casri ah oo fududeenaya isfahamka soo jeediyaha iyo loo jeediyaha ,

@SOMALIBOOKS

Laakiin qalabkaas waxay keeneen in ay dhunto xiriirkii labada qof , waa hadii uusan qofku si dhab ugaranayn adeegsiga qalabkaas ,

Hadaba si aad si fiican uga faa idaystao qalabkaas raac talooyinkaan soosocda :-

1. Adeegso qalbkaaga aad isku hubto hana ku tala galin qalab qof kale ilaa in aad isku hubto in uusan kaaga baxayn .
2. Kutalagal hadii ay xumaadaan qalbka ama ciladi ku imaato , waayo saan ognahay badankood waxay kushaqeeyaan koronto marka waaa in aad diyaar tahay hadii ay korontadu kaatagto oo aysan istaagin muxaadaradii .
3. Goobta aad qalabka dhigayso hanoqoto goob ku haboon oo dadka oodhan ay arkayaan .
4. Iska ilaali in aad ku mashquusho eegida qalabka oo aad dadka dhabarka ujeediso .
5. Markaad adeegsanayso qalabka bandhigista isku day in iftiinka goobtu uu yaryahay si sifiican loogu arko .

Telegram @SOMALIBOOKS



6. Hadii dadku ay kabadan yihiin 50 qof ha adeegsan filib jaartiga waayo waxa adkaanaysa in ay arkaan .
7. Iskuday in qaab qurux badan ama xardhan aad wax usoo bandhigto .

8. Waa in aad aqoon uleedahay borogoraamada wax lagu soo bandhigo ama aad kaashataa qof aqoon uleh sida " powr point " .
9. Waa in warbixinadaadu ay koobann yihiin oo aad qaab qodobo ah usoo badnhigto wixii sharaxaadana afka kaga darto adoo soo koobaya .
10. Iskuday in aad adeegstao sawiro iyo muuqaalo xoojinaya xogtaada waayo hadafka ugu muhiimsan ee loo adeegsado bandhigista waa in dadka latuso wax hadal kabaxsan .
11. Ugu dambayntii iska tijaabi qalabka kahor inta aan lajeedin xogta soona kormeer goobta wax laga jeedinayo adoo hubinaya in qalabkasta kudhan yahay goobta .

Telegram @SOMALIBOOKS



❖ **Tilmaamaha dadka aan ku fiicnayn soo jeedinta .**

@SOMALIBOOKS

1. Yoolkiisa oo aan cadayn

Hadii uu mugdi kaaga jiro sababta aad usoo jeedinayso xogtaan , ogow manoqonayso xogtaadu mid nuxurleh waayo magaran kartid in laga faa idaystay iyo inkale .

2. Diyaarin la'aan

Hadii aadan sifiican usoo diyaarin xogtaada oo aadan samayn akhris badan oo ku aadan mowduuca aad kahadlayso , waxay noqonayaan waxaad soo bandhigayso kuwa aan wax tar lahayn taasina waxay kugu keeni kartaa sumcad daro iyo in aan jaanis kale lagu siin .

3. Qosolka oo kuyar

Telegram @SOMALIBOOKS

Qosolka ama sheekooyinku waa suugada ama dhadhanka xogta hadii aysan xogjeedintaadu lahayn qosol waxay noqonaysa mid ay dadku ka daalaan kana caajisaan .

4. Dadka oo aan kaqayb qaadan .

Saan horay usoo sheegnay doodwadaagu waxay kamdi tahay wadooyinka ay dadku ku xasuustaan xogtii aad ujeedisay, hadii ay xogjeedintaatu aan laga wada qayb qaadan wax nuxur ah mayeelanayso .



❖ Gafafka inta badan ay lakulmaan aftahanadu iyo sida

- **Gafafka inta badan ay lakulmaan aftahanadu iyo sida aad uga hor tagi lahayd .**

Waxaa jira gafaf can ah oo inta badan soo noqnoqda hadaba gafafkaas waxaa kamid ah kuwaan hoos kuqoron waxaana iskudayaynaa in aan raacino talooyin aad uga hortagi lahayd .

| No | Gafka | Xalkiisa |
|---|---|---|
| 1. | Qofkii kaa horeeyay baa yiri inta badan wixii aad dhihi lahayd | Hakusoo celin wuxuu kahadlay |
| 2. | Qofkii kaa horeeyay baa waqtiga ku dheeraaday | Sookoob gabagabadana ugudub |
| 3. | Suu'aal aadan garanayn baa lagu waydiiyay | Usheeg in aadan garanayn , ama dadka ugudbi |
| 4. | Goobta buuq baa kajira | Codka makarafoonka kor uqaad hadii aad awoodi wayday in aad buuqa joojiso |
| 5. | Mowduucii baa lbadalay | Ha wal walin iskuday in aad qoroto qodobada waawayn dadku hadaysan ogayna ha usheegin in mowduucii labadalaya |
| 6. | Hadalka kaa qaldamay | Ha cududaaran sax oo kasii soco |
| 7. | Waad kuftay | Horay u istaag adoo qoslaya ama dhoola cadaynaya kana soco sidii ina aysan waxba dhicin |
| 8. | Qayb dadka ayaa ku xumeeyay | Ha ujoojin hadii ay sii |

Telegram @SOMALIBOOKS

| | | |
|---|---|---|
| | | wadaana kacodso maamulka in laga saaro goobta |
| 9. | Waqtiga aad uyar | Iskuday in aad wixii muhiima aad sheegto , kuna soo talagal marka hore waqtiga aad haysto |
| 10. | Kuma qanacsanid qaabka diyaar garowgaaga | Ogow in aad dadaashay kanawarsug dadku in ay iyagu ku qiimeeyaan, waligaana ha sibarbardhigin qofkale . |
| 11. | Su'aashaadan fahmin | Codso in laguugu soo celiyo |
| 12. | Muxaadarad aad bay udagtahay | Iskuday marka hore in aad sharaxdo ereyada adag |
| 13. | Waad yartahay | Ogow in uusan cilmigu lahayn yaraan |

Telegram @SOMALIBOOKS

Intaasi waa gafafka ugu muhiimsan waxaase jira kuwa badan oo iyana soo noqnoqda , waligaa ogow in uusan jirin gaf aan xal lahayn , ogowna in qofkasta uu gaf galo laakiin laisku dhaamo qaabka loo xaliyo ama looga horatago gafgaas , waxaase xun in aad caadaysato oo aad marwalba soo cel celiso gafkaaga .

## Gunaanadka

Ugu dambayntii waxaa mahad leh eebe wayne iisuura galiyay in aan qoro buugaan .

Intaa kadib

Waxaan akhriste rajaynayaa in aad si wanaagsan uga faa iday akhrinta buugaan .

Waxaan sidoo kale karaali galinayaa wixii iin ah oo buuggu leeyahay , waxaana diyaar u ahay in aan waxkabadalo khalad kasta oo kusoo arooray buugga , haduu alle idmo .

Waxaan kaa rajaynayaa akhriste in aad wixii talo iyo toosin ahba aad iisoo diri doonto si aan wax uga badalo dabcada 2aad inshaa alaah ,

Waxaan marlabaad u mahad celinayaa dhamaan cidii kaqayb qaadatay gacanna iga siisay soosaarista bug yarahaan .

Telegram @SOMALIBOOKS

Sakariya axmad maxamed

Zakiaxmed638@gmail.com

@SOMALIBOOKS



# Tixraaca buugga

Waxaa kamid ah buugaagtii aan soo xigatay :-


1. Kitaabka turjumidda quraanka kariimka , ee uu turjumay sheikh maxamuud maxamed cabdi , daabacdayna madbacdda fahad ee daabicista quraanka kariimka .
2. qaabka ugu wanaagsan ee wax loo jeediyo qore Dr. daariq alsuwaydaan , waxaana daabacday madbacada Al ibdaac Walfikr , sanadkii 2008 , bayjka 26
3. fanka khudbadaha iyo diyaarinta khadiibka , maxfuud ,sheikh cali , daar al ictisaam
4. lakulanka jamhuurka , qore dr.akrim rida, daar ALtowsiic wan nashri , dabcada 1aad ,2000
5. side baad udiyaarin kartaa muxaadaro , qore yoonis cabdi alrab ,
6. xirfadaha wax jeedinta xiisa leh , qore diktoorayso suusan axmad almucalimi
7. xirfadaha wax jeedinta , iyo tababarka, taba barayaasha , waxaa soo ban dhigay , xarunta "al tafkiir al ibdaacii "
8. jeediyha fiican , prof.cabdikarim bakaar,waxaa daabacay madbacadda daarusalaam , sanadkii 2010 m ,
9. qaabka wax loodiyaariyo loona jeediyo , qore saami bin khaalid almaxamuud , maktabadda sayd alfu'aad al islaamiya.
10. qaabkeebaad uhormarin kartaa awoodahaaga bandhigeed , qore miikhaaiil , istiifan , waxaa lagu daabacay madbacadda international ideas home ,


Telegram @SOMALIBOOKS

Telegram @SOMALIBOOKS